



JPLG
UN Joint Programme on
Local Governance and Decentralised
Service Delivery



UN HABITAT
FOR A BETTER URBAN FUTURE



LAW
Legal Action Worldwide

Buuga Tababarka ee Khilaafaadka Dhulka la hor keeno Gudiga Khilaafaadka Dhulka ee Somaliland

July 2017



Tusmooyinka

HORDHAC	03 - 07
CUTUBKA 1AAD. MABAADI'DA AASAASIGA AH EE MAAMULKA CADAALADDA.....	07 - 13
CUTUBKA 2AAD. AWOODDA MAAMUL EE GUDİYADA KHILAAFAADKA DHULKA	13 - 18
CUTUBKA 3AAD. HABRAACA FAYLGARAYNTA IYO FURITAANKA KIISASKA GKHDH	19 - 25
CUTUBKA 4AAD: HABRAACA DHEGAYSIGA KIISASKA IYO GO'AAN QAADASHADA	25 - 51

Hordhac

Sharciga maamulka dhulka magaalooyinka Somaliland, Sharci nambor 17/2001 ("Sharci nambor 17/2001"), wuxuu aasaasaa oo dejiyaa nidaamyada gudiyaada khilaafka dhulka magaalooyinka Somaliland. Sida ku xusan qodobka 28 ee Sharci nambor 17/2001, Gudiyaada khilaafaadka dhulka ee Magaalooyinku waa gudiyo maamul oo ka kooban toddoba xubnood oo ka socda Wasaarado kala duwan, waxaana magacaaba Wasiirka Arimaha Gudaha. GKHDH waxaa loo aasaasay si ay u bixiyaan adeegyo ay ku xalinayaan khilaafaadka dadweynaha, khaasatan khilaafaadka la xidhiidha dhulka magaalooyinka. Hordhaca Sharci nambor 17/2001 wuxuu qeexayaa ujeedooyinka muhiimka ah ee GKHDH sida: "... si loo xakameeyo dhul-boobka, iyo in la sameeyo qaab lagu xalliyo khilaafaadka dhulka magaalooyinka si ka dhaqso badan kana fudud ... marka loo eego habka maxkamadaha madaniga ah. "Sidaa daraadeed, GKHDH, waa hay'adaha maamulka iyo xalinta khilaafaadka lana siiyey xil sharciyeedka xalinta khilaafaadka dhulka magaalooyinka Somaliland. Sida maxkamadaha caadiga ah, GKHDH waxa laga filayaa in ay adeegyadooda u siiyaan dadweynaha hab ku haboon xuquuqda aasaasiga ah una socda nidaam sharci oo cadli ah oo uu damaanad qaaday dastuurka Somaliland.

Tilmaamaha GKHDH

- Wakaalado maamul oo leh awood Maxkamadeed oo kale.
- Waxa keliya ee loo xilsaaray in ay dhegaysato khilaafyada dhulka magaalooyinka ee meel khaas ah.
- Ujeedadu waa in dhegaysato khilaafyada hab ka fudud kana hufan Maxkamadaha.
- Loogu talagalay in ay heli karaan dhamaan reer Somaliland

Laakiinse, GKHDH waxa loogu talagalay inay noqdaan kuwo aan rasmi ahayn oo la heli karo. Waxay qaadaan habab badan oo ka dabacsan maxkamadaha caadiga ah kuwaas oo u ogolaanaya GKHDH in ay dadweynaha siiyaan adeegyada xallinta khilaafaadka dhulka magaalooyinka si deg deg ah oo wax ku ool ah.

Wakhti xaadirkan waxa jira sadex GKHDH oo la aasaasay kana shaqeeya Somaliland: GKHDH ee Hargeysa, oo la aasaasay 2010, iyo GKHDH ee Berbera iyo Borama oo labadoodaba la aasaasey badhtamihii 2014. Bishii Sebtembar 2014, Wasaaradda Arimaha Gudaha ee Somaliland, oo fulinaysay waajibaadkeeda sida ku cad qodobka 28-aad ee Sharci No 2001, waxay soo saartey oo hirgalisay xeerkaa ugu horeeyey ee aasaasida iyo hawlaha GKHDH ee Somaliland. Khaasatan, xeer GKHDH No 1/2014 wuxuu soo koobaya aasaasida, qaabdhismeedka, iyo hawlaha GKHDH, iyo sidoo kale nidaamka lagu xallinayo khilaafaadka dhulka magaalooyinka. Iyadoo loo eegayo xeerarkan, GKHDH waxay raaceen nidaamka adag ee maxkamadaha caadiga ah. Qiimayn la sameeyey 2015 iyo 2016 ayaa soo gabogabeysay in nidaamkani yahay mid aan

ku haboonayn laguna gaadhi karin ujeedooyinka lagu sheegay GKHDH, oo ay ku jiraan bixinta nidaam fudud iyo hab kasii hufan ka ay maxkamaduhu raacaan.

Wadahadal ku saabsan natiijooyinka daraasaddan iyo seminaaro dambe oo ku saabsan caqabadaha xalinta khilaafaadka dhulka magaalooyinka ee Somaliland ayaa soo koobay talooyin ku saabsan kor u qaadista iyo hagaajinta awoodda GKHDH si loo bixiyo adeegyada xalinta khilaafaadka dhulka oo tayo leh laguna kalsoonaan karo. Talooyinka muhiimka ah ee lagu heshiiyey mudnaantana la siiyey waxay ahayd in dib loo eego wax ka bedelna lagu sameeyo sharciga GKHDH. Xeerka cusub ayaa loo qabyoqoray si waafaqsan taladan, waxaana la filayaa in Wasaaradda Arimaha Gudaha ee Somaliland ay sanadka 2017 ansixiso. Buugan tababarku wuxuu ku salaysan yahay Xeerka wax laga bedelay.

Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH wuxuu si cad u qeexayaa awoodda-maamul ee GKHDH iyo shuruudaha magacaabida xubinimada waxay qeexaysaa qaabka gaarka ah ee GKHDH si loo maareeyo fayl gareynta iyo diiwaangelinta, waxayna qeexaysaa habka loo marayo GKHDHka dhegaysiga ay tahai in ay raacaan GKHDH. Buugan tababarka waxaa loo sameeyey in ay caawiso fulinta Xeerka wax laga bedelay.

Buug tababarka wuxuu daboolayaa mawduucyada tababarka muhiimka ee hoose si loo helo maamul iyo maareyn wax ku ool u ah khilaafaadka dhulka ee magaalooyinka:

1. Awoodda-maamul ee Gudiyada.
2. Habraacyada faylgaraynta iyo furitaanka kiisaska.
3. Habraaca dhegaysiga iyo maareynta dacwadaha.

4. Go'aan qaadashada iyo qaabaynta go'aanada GKHDH.
5. Fulinta.

Buuga tababarku wuxuu ka koobanyahay shan cutub, oo daboolaya mabaadi'da ka danbeeya hawlgalka GKHDH iyo talaabooyinka la taaban karo iyo habraac ee dhegaysiga kiiska:

1. Cutubka 1aad: Mabaadi'da aasaasiga ah ee Maamulka Cadaaladda.
2. Cutubka 2aad: Awoodda-maamul ee Gudiyada Khilaafaadka Dhulka.
3. Cutubka 3aad: Habraaca faylgaraynta iyo furitaanka kiisaska GKHDH.
4. Cutubka 4aad: Habraaca Dhegaysiga kiisaska iyo go'aan qaadashada.
5. Cutubka 5aad: Fulinta go'aanada.

Habka loo dejiyay tababarada ee lagu bixiyey buugan tababarka ayaa ah sidan soo socota: Marka hore, qodobada Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH ee la xidhiidha mawduucyada tababarka ee kor ku xusan waxaa loo sharaxi doonaa dadka la tabarayayo; iyo ta labaad, waxa jiri doona daraasado la taaban karo iyo malayn si ay dadka tababarka qaadanaya u caawiso in ay bartaan habka ugu haboon ee loo hirgelin karo habraaca iyo qodobada xeerka wax laga bedelay ee hawl maalmeedkooda. Dadka la tababaro ee la beegsanayaa waa xubno ka mid ah GKHDH, daneeyayaasha kale ee muhiimka ah, iyo go'aan qaadayaasha la xidhiidha GKHDH ama xalinta khilaafaadka kiisaska ku lug leh dhulka magaalooyinka.



1.1 Hordhaca Gudiyada Khilaafaadka Dhulka ee Somaliland

Si looga gudbo qaar ka mid ah caqabadaha ay keeneen nidaamka sharci ee rasmiga ah iyo ka dhaqan, waxay Wasaaradda Arimaha Gudaha ee Somaliland ay sannadkii 2010-kii sameysay Gudiyada Khilaafyada Dhulka (GKHDH). GKHDH ee Hargeysa Somaliland waxay shaqeyneysay muddo shan sano ah. GKHDH ee Berbera iyo Borama waxa la aasaasay 2015. GKHDH waxa loogu talagalay in ay noqoto hay'ad isku-dhafan oo iswaafajisa habraacyada sharciyada rasmiga ah iyo xeerar dhaqameedka si loo bixiyo habraac lagu kalsoonyahay, wax ku ool ah iyo madal xalin khilaafeed ixtiraamaysa xuquuqda.

2.1.1 Ujeedooyinka GKHDH

Hordhaca Sharci No 17 wuxuu sheegayaa in ujeeddada GKHDH ay tahay "in la cidhibtiro dhul boobka iyo in la sameeyo hab fudud oo lagu xaliyo khilaafaadka dhulka magaalooyinka." Shuruuda ah in GKHDH ay

sameeyso 'fududeyn' lagu xaliyo khilaafaadka dhulka ayaa tilmaamaya in ay noqdaan kuwo hufan oo aan rasmina aheyn sida Maxkamadaha. Asal ahaan, GKHDH waxaa loogu talagalay in lagu gaadho tan iyada oo u shaqeyneysa sidii xarun isku dhafan, oo ka soo amaahanaysa labadaba waa maxkamadaha iyo nidaamka xeer dhaqameedka¹. Sharcigu wuxuu sidoo kale ku qiyaasayaa in GKHDH ay ku taalo degmo kasta, si ay u heli karaan dhamaan dadka reer Somaliland.

Sidaa darteed, ujeedooyinka GKHDH waxa loo qaybin karaa sida soo socota:

Ujeeddada 1aad: Hufnaanta	In la bixiyo hab wax ku ool ah oo lagu heli karo magdhowsharci iyo caawimaad ku saabsan khilaafaadka la xidhiidha dhulka magaalooyinka.
Ujeeddada 2aad: Helitaanka	In ay heli karaan dhamaan dadka reer Somaliland, marka laga eego kharashka iyo gaadhista iyadoo ay ka samaysanyihiin degmo kasta.
Ujeeddada 3aad: Isku-dhafni	In la abuuru urur isku-dhafan oo isticmaasha faa'iidooyinka labada nidaam sharci ee maxkamadaha rasmiga ah iyo ka xeer dhaqameedkaba

¹ Tani waxa looga qaadan karaa qoraalka asalka ah ee Xeerka GKHDH, oo ay ku jiraan qodobo badan oo loogu talagalay abuurista hay'ad isku dhafan oo ay ka mid yihiin dhexgelinta odayasha ee gudiga iyo mudnaan siinta wada raalahaanshaha dhinacyada.

2.1.2 Sababta xubinimada iyo mas'uuliyada Gudiyada Khilaafaadka Dhulka loogu daray/qaybiyey hay'ado kala duwan oo dawli ah.

Awoodo-maamulo isbarbadhig waxay tijaabiyeen shakhsiyaad iyo hababka xulasho kala duwan ee gudiyo dhuleedkooda. Gudiyadani waxay ahaayeen kuwo aad u waxtar badan marka xubnahooda laga soo magacaabo ama ay soo doortaan dhawr hay'ado dawli ah oo kala duwan iyo xubnahooda oo si xidhanyihiin gobolka ay ka shaqeeyaan. Qiimaha dheeraadka ah ee wakiilada dowladu leeyihiin waa aqoontooda khaaska ah ee qaybo gaar ah oo la xidhiidha dhulka. Hadii aqoontoodu ay la xidhiidho qayb gaar ah oo ay GKHDH tixgelinayso, tani waxay kordhinaysaa faa'iidada Gudiga. Qiimaha dheeraadka ah ee ay leedahay kala qaybinta maamulka, xubinimada, maaraynta iyo mas'uuliyada isla-xisaabtanka Gudiyada in loona qaybinayo Wasaarado kala duwan waa in habkaasi uu xadido musuqmaasuqa iyo yaraynta suurtagalnimada maareyn-xumo iyada oo la qaysanayo mas'uuliyadaha lana kordhinayo islaxisaabtanka.

3.1.1 Sharciyada Dhulka ee Somaliland oo kooban.

Somaliland waxa ka jira shan sharci oo waaweyn lana fuliyo khuseeyana maamulka dhulka:

a) Dastuurka (2001)

Dastuurku wuxuu ilaaliyaa xuquuqda hantida gaarka ah, sinaanta, helitaanka cadaaladda iyo xuquuqda haweenka. Waxay kaloo in aqoonsiya siinaysaa sharciyada caalamiga ah.

Qodobka 10 (2): Xidhiidhka Dibedda

Jamhuuriyadda Soomaliland waxay aqoonsan tahay, kuna dhaqmaynsaa Axdiyada Qaramada Midoobay iyo Qaanuunka Dawliga ah; waxa kale oo ay xurmaynaysaa Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga {Universal Declaration of Human rights}

b) Xeerka Maamulka Dhulka Magaalooyinka (Sharci No 17)

Sharci No 17 wuxuu dejiyaa dhulka magaalooyinka wuxuu kaloo dejiyaa Maamulida dhulka magaalooyinka, qoondaynta dhulka, qorsheynta iyo horumarinta dhulka, haysashada dhulka, dhulka loo qoondeeyo isticmaalka dadweynaha iyo magdhowga iyo aasaasidda GKHDH.

Laakiinse ma cada iskumaxidhna waxaanay keentay nidaam adag oo lagu maamulo dhulka.

c) Xeerka Xalinta Khilaafaadka Dhulka Magaalooyinka, Xeer nambar: 01/2014

Xeer nambar 01/2014 wuxuu maamulaa awoodda-maamul, qaabdhismeedka gudaha hay'ada, faylgareynta iyo furitaanka kiisaska, tilmaamayaasha habraaca, xeerarka sida loo gudbinayo cadaynta iyo dhegaysiga markhaatiyada, fulinta go'aamada, rafcaanka iyo xidhiidhka ka dhexeeya GKHDH iyo hay'adaha kale ee dawliga ah. Ka sokow cadayn iyo isku xidhnaan la'aanta, waxaanay keentay nidaam adag oo lagu maamulo

dhulka, nidaamyo adag iyo iyadoon lahayn amniga haysashada dadka saboolka ah iyo barokacayaasha.

d) **Sharciga Lahaanshaha Dhul Beereedka**

Sharciga Lahaanshaha Dhul Beereedku wuxuu dejiyaa dhul beereedka wuxuuna aqoonsan yahay dhulka xoola-dhaqatada / daaqsinka. Waxay mas'uuliyadaha maamulka u qoondaysay wasaaradaha iyo maxkamadaha waxay u qoondaysay xalinta khilaafaadka. Laakiinse, ma qeexayo dhulka daaqsinka mana sugayo xuquuqda xoolo dhaqatada.

e) **Xeerka Madaniga iyo Xeerka Habraaca Madaniga**

XHM wuxuu dejiyaa habraaca dhegaysiga-ka-hor oo ay ku jirto habka ay tahay in dacwooyinka loogu gudbiyo GKHDH, habka kiisaska, go'aaminta cadaynta, fulinta go'aanada iyo wadada loo marayo rafcaanka. Xeerka madanigu wuxuu dejinayaa lahaanshaha, iibinta iyo wareejinta hantida iyo diiwaangelinta iyo daabacaada dukumentiyada. Inkastoo labada xeerba ay u baahanyihiin in mulkiyadaha lagu xareeyo maxkamadda, ma jiro wax diiwangelin mulkiyadeed ah oo lagu sameeyo maxkamadda.

Qodobka 28aad: Xaq Dacwaynta iyo Difaaca.

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu dacwad ka oogo Maxkamad karti u leh sida waafaqsan sharciga.
2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu isku difaaco Maxkamad.
3. Dawladdu waa in ay bixisaa difaac sharci oo bilaash ee arimaha lagu go'aamiyay sharciga, khidmadaha maxkamada waa laga dhaafi karaa danyarta

CUTUBKA 1AAD. MABAADI'DA AASAASIGA AH EE MAAMULKA CADAALADDA

Sida kor ku xusan, GKHDH waa wakaalado maamul kuwaas oo la siiyey awood maxkamadeed oo kale ujeedaduna tahay in la dadweynaha loo helo adeegyo hufan dhakhsana ah oo lagu xalinayo khilaafaadka dhulka magaalooyinka. Si ay u gutaan waajibaadkooda iyo doorkooda maamulka cadaaladda, GKHDH, sida maxkamadaha, waxa looga baahanyahay in ay ixtiraamaan ayna taageeran mabaadi'da asaasiga ah ee cadaaladda ee hoose:

1. Go'aamo cadli ah iyo wakhti go'aan haboon.
2. Helitaanka.
3. Madax-banaani iyo dhexdhexaadnimo.
4. Isla-xisaabtanka.

Mabaadi'dan aasaasiga ah ee maamulka cadaaladda ee GKHDH iyo dhamaan xubnaha GKHDH waxa laga filayaa inay taageeraan,

marka ay fulinayaan waajibaadka GKHDH, waxay ka soocayaan xuquuqda aasaasiga ah ee lagu helo garsoorka. Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland wuxuu aqoonsadaa oo ilaaliyaa xuquuqda qofku inuu u helo garsoorka Qodobka 28aad wuxuu sheegayaa in qof kasta uu xaq u leeyahay in uu soo gudbiyo cabasho ama in uu isku difaaco maxkamad karti u leh. Inkastoo aanay maxkamad ahayn, GKHDH waa hay'ado maamulid leh xil sharci oo ay ku dhegaysan ayna go'aan ka gaadhi karaan khilaafaadka dhulka magaalooyinka. Qodobka 28-aad ee sharci nambor 17/2001, oo aasaasay GKHDH, wuxuu si cad u qeexayaa in dhamaan go'aanada kama dambaysta ah ee GKHDH ee khilaafka dhulka magaalooyinka in rafcaan loo qaadan karo Maxkamadda Sare, oo ah hay'ada garsoorka ee ugu sareysa dalka. Guud ahaan, GKHDH waa wakaalado maamul oo la siiyey xilka garsoorka oo kale si ay dadweynaha u siiyaan adeegyada xalinta khilaafaadka ee khilaaf dhuleedka magaalooyinka si waafaqsan xuquuqda uu shakhsigu u leeyahay in uu helo cadaalad.

Dastuurka Somaliland ma qeexayo waxa loola jeedo xaq u lahaanshaha helida cadaaladda. Hasayeeshee, dastuurku wuxuu bixiyaa in dhamaan xuquuqda aasaasiga aadanaha ee ay aqoonsantahay in loo fasirto si waafaqsan nidaamyada la aqbalay ee sharciga caalamiga ah ee xuquuqal aadanaha la aqoonsan yahay. Xaqa helitaanka cadaaladda shakhsi ahaaneed waa mid caalamka oo dhan laga ogolyahay oo qorayaa mabaadi oo aasaas u ah maamulka cadaaladda. Hadii aan la eegin oo la taageerin mabaadi'da aasaasiga ah ee maamulka ku lug leh hubinta in cadaaladu

tahay mid la heli karo, way ku adkaan kartaa hay'ad kasta oo khilaafka xaliso in ay hayso ama xaliso khilaafaadka si wakhti haboon, cadaalad ah, iyo qaab waafaqsan filashada dadweynaha si loo helo kalsoonida dadweynaha.



Tani waxay kor u qaadaysaa qiimo kaloo muhiima ah ee maamulka cadaaladda iyo kartida ay u leeyihiin in ay ku kasbadaan kalsoonida dadweynaha . Sida bixiyayaasha adeeg xalin khilaafeedka, waxay aad muhiim iyo lagama maarmaan u tahay GKHDH in ay haystaan oo ay sii xejistaan kalsoonida dadweynaha iyo aaminida adeegyadooda. Hadii aan la helin kalsoonida shacabka, GKHDH waxa ku adkaan in ay fuliyaan waajibaadkooda nidaamka maamulka cadaaladda, iyo ilaalinta nabada iyo xasiloona bulshada. Hadii dadweynuhu ay ku kalsoonaan waayaan nidaamka GKHDH, waxa iska cad in dadwaynuhu ay xalinsan doonaan khilaafaadkooda - taasoo keeni karta xasillooni la'aan, amni daro, iyo cadaalad daro baahsan. Tani waxay dhici kartaa hadii GKHDH, oo hayad xalin khilaafeeda, ay ku guuldareysato in ay:

- ❖ Ula dhaqan dadweynaha iyo dhinacyada iskhilaafsan si cadaalad iyo qadarin leh.
- ❖ U xali khilaafaadka si karti leh, si fiicana u faham kiiska.

- ❖ Maqal baahiyaha iyo filashooyinka xubnaha GKHDH iyo shaqaalaha, kana jawaab sida ku haboon.

Si loo helo ama looga hortago waayista kalsoonida dadweynaha, waxa looga baahan yahay GKHDH in ay gutaan waajibaadkooda gaadhsiinta adeegyada xalinta khilaafaadka dadweynaha si waafaqsan mabaadi'da aasaasiga ah ee cadaaladda kana soo baxa xaqa aasaasiga ah ee lagu helo garsoorka. Mabaadi'daas waxay ku lug leeyihiin sameynta cadaalad iyo go'aan wakhti haboon, iyo sidoo kale ilaalinta helitaanka, madax-banaanida iyo dhexdhexaadnimada, iyo isla-xisaabtanka. Mid kasta oo ka mid ah mabaadi'dan aasaasiga ah xaga hoose ayaa lagu soo koobi laguna sharixi doonaa.



1. Cadaalad iyo wakhti go'aan haboon

Mabda'a go'aano cadaaladda iyo wakhti haboon waa ka ugu muhiimsan ee maamulka iyo bixinta adeegyada xalinta khilaafaadka ee dadweynaha, oo ah saldhigga Gudiga Khilaafaadka Dhulka. Mabaadi'da aasaasiga ahi waa mid ka mid ah mabaadiida aasaasiga ah ee Gudiyada Khilaafaadka Dhulka ee Somaliland lagu aasaasay. Sida ku cad hordhaca sharciga maamulka dhulka magaalooyinka, sharci No 17/200, ujeedada gudiyada khilaafka dhulka magaalooyinku

waa in ay dadweynaha siiyaan xalin khilaafka dhulka magaalooyinka si wax ku ool ah laguna kalsoonaan karo dhakhsana ah.

Mabda'a go'aanka cadaaladda waxay xaq u siinaysaa dhamaan dhinacyada iskhilaafsan xuquuqdooda aasaasiga ah ee lagu dhegaysto kuwaas oo ay ka mid yihiin: **ogaysiis ku filan, dhegaysiga cadaaladda, xaqa in uu dhanka kale wax weydiyo, fursada in uu latalin sameeyo, xuquuqda bandhigida cadaynta, xuquuqda u yeedhida markhaatiyo bixin kara cadaymo haboon, sababaha go'aanka, iyo xaqa racfaan qaadasho sida waafaqsan sharciga.**

Su'aalaha aasaasiga ah ee ay tahay in Gudigu uu weydiyo waxa ka mid ah:

- Dhinacyada ma la siiyay macluumaad ku filan oo ku saabsan kiiska lagu haysto?
- Dhinacyada ma la siiyay fursad ku haboon in ay kaga jawaabaan?
- Dhinacyada ma lagu siiyay dhegaysi iyo go'aan mudo macquul ah?
- Dhinacyada ma la siiyay sababo ku filan oo ku aadan go'aanka?
- Go'aanku ma ku salaysana macluumaad khuseeya oo sax ah?
- Xaqiiqooyinka iyo / ama sharciga la isku haleeyay ee go'aanku ma ahaayeen sax?
- Go'aanku ma ahaa mid si fiican u sababaysan laguna siiyay dhinacyada wakhti macquul ah?

Cutubka sadexaad ee xeerka ayaa bixinaya habka loo sameeynayo go'aanada khilaafaadka dhulka magaalooyinka wuxuu kaloo qeexayaa qodobu ku waajbinaya GKHDH in ay ka fogaato dib u dhigista natiijada khilaafaadka². Waxa kale oo ka mid ah qodobu ka dalbanaya GKHDH in ay si dhakhso ah u xaliyaan khilaafka hadii aysan jirin sabab macquul ah oo dib loogu dhigo dhegaysiga³. Xeerku wuxuu kaloo bixiyaa qodobu u baahan in go'aanka ugu dambeeya ee GKHDH ee ku saabsan khilaafaadka dhulka magaalooyinku uu noqdo go'aano caqli gal ah kuna salaysan cadaamaha khuseeya saxdana ah⁴.

Hasayeeshee, mabda'a cadaaladu ka badan siinta dhinacyada go'aan cadaalad ah iyo wakhti go'an haboon oo keliya. Waxa kaloo ku jira bixinta macluumaad iyo adeegyo si fudud loo heli karo, loo isticmaali karo, lana fahami karo; ula dhaqamida ka qaybgalayaasha si qadarin iyo ixtiraam leh. Waxay keenaysaa su'aalo ku saabsan qaabka ama habka ay xubnaha gudiga iyo shaqaalaha ay ula dhaqmeen dhinacyada intii ay xidhiidhka la lahaayeen gudiga, sida:

Xubnaha iyo shaqaalaha Gudigu ma ahaayeen qaar la wajihi karo oo wax caawin kara?
 Dhinacyada iskhilaafsan ma loola dhaqmay si qadarin iyo ixtiraam leh?
 Dhinacyada ma la siiyay hagitaan haboon intii lagu guda jiray hawsha?

² Eeg Qodobka 32 ee Xeerka oo sheegaya qodobada xamakaynaya dib u dhigista dhegaysiyada kiiska

³ Eeg Qodobka 34 ee Xeerka

⁴ Eeg Qodobka 51 ee Xeerka ee dejinaya nadaamka go'aanada kama dambaysta ah ee GKHDH

2. Helitaanka



Hadii dadweynuhu aaney si sahlan u heli karin GKHDH, waxay horseedi doontaa diidmada xuquuqda ay u leeyihiin inay helaan garsoorka dhinacyada iskhilaafsan, iyo waayitaanka aaminida iyo kalsoonida dadweynaha. Caqabadaha suurtagalka ah ee dadweynaha aan u saamaxeyn in ay helaan GKHDH waa ay badanyihiin waxaana ka mid ah caqabado muuqda iyo qaar aan la arki karin:

- ❖ *Caqabadaha muuqda* – Masaafada goobta Gudiga, kharashka la xidhiidha kiiska gudiga, iyo khidmada garyaqaanada ayaa ka mid ah caqabadaha suurtagalka ah ee muuqda kana hor istaagi kara shakhsiga in uu helo adeegyada GKHDH.
- ❖ *Caqabadaha aan la arki karin* - Dhinacyada oo aan garanayn cida ama xafiiska ay u gudbinayaan kiiskooda, ama cida ay tahay in ay ka hadlaan kiiskooda ama u gudbinta codsiyada ama cabashooyinka; shuruudaha iyo waxyaabaha looga baahan yahay buuxinta iyo u gudbinta cabashooyinka gudiyada; wakhtiga, meesha iyo xubnaha dhegaysanaya kiiskooda. Sii dheeraynta dhegaysiga iyo habka xalinta sidoo kale waa caqabad kale oo suurtagal ah lana

arki karin oo la xidhiidha helitaanka Gudiga.

Arimaha kor ku xusani waxay caqabad ku yihiin helitaanka Gudiga, jiritaanka mid ka mid ah caqabadaha noocan oo kale waxay horseedi doontaa in dhinacyada iskhilaafsan iyo guud ahaan dadweynuhu ay lumiyaan kalsoonida ay ku qabaan nidaamka. Bal si aad u ogaatid in ay jiraan caqabado hor taagan helida gudigaada, waxaad u baahan tahay in aad weydiiso kana jawaabto kuwan soo socda:

- Lacagta la xidhiidha kiisaska gudigu miyey badantahay mase la awoodi karaa?
- Ma jiraa nidaam qoran iyo habraac la ogyahay oo lagaga dhaafo lacag bixinta kiisaska la xidhiidha gudiga dadka aan awoodi karin in ay bixiyaan?
- Dadweynuhu ma yaqaanaan goobaha Gudiga?
- Goobaha shaqada ee Gudigu ma yihiin qaar si fudud loo gaadhi karo iyadoon la gelin kharash aan la goyn karin?
- Shaqaalaha Gudigu ma yihiin qaar la wajihi karo oo wax caawin kara?
- Dhinacyada iskhilaafsan ma loola dhaqmaa si qadarin iyo ixtiraam leh?
- Dhinacyada ma la siiyaa hagitaan haboon inta lagu guda jiro hawsha?

Hadii mid ama in ka badan oo ka mid ah caqabadaha kor ku xusan uu /ay jiraan, waxa lagaa rabaa in aad ka wada hadashaan xalna u samaysaan.

3. Madaxbanaani iyo dhexdhexaadnimo

Madaxbanaanida Gudiga micnaheedu waxa weeyaan in Gudiga iyo xubnaheedu ay awood u leeyihiin in ay gutaan

waajibaadkooda xirfadeed iyada oo aanay wax saameyn ah ku yeelan qaybaha kale ee hay'adaha Dawladda (hoose ama dhexe) ama sarkaal ama ilo kale oo aan habooneyn. Mabda'a madaxbanaanidu waa mid aad u muhiim ah oo u suurtoogelinaya Gudiga iyo xubnaheedu in ay hubiyaan go'aamo cadaalad ah oo ku saabsan khilaafaadka ay dib u eegayaan.

Mabda'a madaxbanaanidu waxay tahay in dhegaysiga iyo maareynta hababka dacwadaha, iyo sameynta go'aamada Gudiga, xubin kasta oo kamid ah xubnaha gudiga waxa waajib ku ah in ay go'aan ka gaadhaan kiisaska hor yaala kuna salaynaya sharciga, xorna ka ah nooc kasta oo saameyn ah, cabsi ku dhaleeceyn shakhsiyeed, ama aargudasho nooc kasta ah.

Muhiimada mabda'a madaxbanaanida Gudiyada waxa lagu aqoonsadey laguna balanqaaday qodobka 8-aad ee Xeerka GKHDH kaas oo bixiya sida soo socota:

- 1) Gudigu waa in ay si buuxda u madaxbanaanaato marka ay maamuleyso dhegaysiga, sameynta go'aanada, iyo qaadashada talaabooyinka lagama maarmaanka ah ee la xidhiidha kiisaska hoos imanaya awoodooda-maamu.
- 2) Ma aha in ay hay'ad dawladeed, Maxkamad, ama hay'ad aan dawli ahayni ay faragalin sameyso, saameyn, ama ay farto Gudiga maamulida arimaha khilaafka dhulka.

Sidaa darteed, GKHDH iyo xubnaha GKHDH waxa looga baahan yahay in ay xilkooda ku

gutaan maareynta iyo natijada khilaafaadka iyaga loo keenay si madaxbanaan.

Dhexdhexaadnimaduna waa mabda' kale oo aasaasi ah la'aatedna gudi ma madaxbanaanaaneyso, dhinacyada iskhilaafsana ma siin karto cadaalad iyo wakhti go'aan haboon ku saabsan khilaafkooda. Mabda'a dhexdhexaadnimadu wuxuu aasaas u yahay shaqada gudiga iyo xubnaha gudiga. Inkasta oo madaxbanaanidu ay tixraacayso ka soocida gudiga hay'adaha kale ee Dawladda, macnaheedu waa in xubnaha Gudigu ay mar kasta u dhaqmaan si aan lahayn dareen shakhsi laakiin xaqiiqda eegaya , iyada oo aaney jirin xaglin/eex shakhsiyadeed ama aan sii go'aansan fikrado la taaban karo oo ku saabsan arinta iyo dhinacyada ku lug leh, iyo iyadoon kor loo qaadin danaha dhinacyada midna⁵.

Xeerka GKHDH si cad uma sheegayo shuruuda dhexdhexaadnimada, laakiin xeerka anshaxa garsoorka iyo anshax-marinta garsoorayaasha Somaliland, oo loo tixraacayo qaar lagu dhiqi karo GKHDH⁶, soojeedinayaan xeerar ku saabsan dhexdhexaadnimada GKHDH iyo xubnaha GKHDH. Dhexdhexaadnimadu waxay ka mamnuucaysaa xubnaha GKHDH in ay ku lug yeeshaan dhegaysiga kiisaska GKHDH, marka ay xubini:

- ❖ La leedahay xidhiidh qoys ama saaxiibtinimo dhow ama xidhiidh ganacsi dhinac kamid ah kuwa iskhilaafsan.
- ❖ Cadawtinimo taariikhi ah ay u hayso dhinac ama qoyska dhinacaas.

⁵ Eeg qoraalka nambor 8 ee xage sare

⁶ Eeg Qodobka 8 (3) ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay

- ❖ Ka leedahay dan dhaqaale (toos ama si dadban) natijada kiiska; ama
- ❖ Hore ugu lahayd xidhiidh xirfadeed kiiska.

Mabda'u wuxuu sidoo kale ka mamnuucayaa xubnaha GKHDH in ay muujiyaan ra'yi muujinaya saadaalinta lagu go'aaminayo kiisaska, ama bayaano inta lagu jiro dacwadaha oo muujinaya cadaawad aan macquul ahayn oo ku wajahan dhinac, lataliye, markhaati kiis, ama ula dhaqmid dhinacyada kiiska mid kamid ah si takoorid ah.

Sida kor ku xusan, **qaadashada ama dalbashada laaluushka, go'aaminta khilaafaadka ku salaysan xaglin sida qaraabokiilka, kala-takooridda dhinacyada sababtay doonto ha noqotee iyo wixii la mid ah dabecadaha xaglinta ah, ama dhexgalka dhegaysiga khilaaf dhuleed uu xubinta GKHDH uu la leeyahay xidhiidh shakhsiyadeed mid kamid ah dhincayada iskhilaafsan**, waxay kamid yihiin qodobada ugu muhiimsan ee saameeya dhaawicina kara dhexdhexaadnimada GKHDH. Dhexdhexaadnimadu la'aantu waxa ay horseedi doontaa in lagu xadgudbo madaxbanaanida iyo helitaanka GKHDH, iyo dhinacyada iskhilaafsan xaqa ay u leeyihiin sinaanta sharciga hortiisa iyo xaqa helista go'aan sax ah oo cadli ah.

4. Isla-xisaabtanka

Mabda'a isla-xisaabtanka GKHDH waa muhiim waxaanu lagama maarmaan u yahay laba sababood oo ugu muhiimsan: si looga hortago in xubnaha maxdamadu ama

GKHDH ay ku takrifalaan awoodooda, iyo in la sugo kalsoonida dadweynaha ee garsoorka. Hadii aysan jirin dariiq laguga xisaabtamayo filicada ay sameeyaan GKHDH iyo xubnaha GKHDH, ma suurtageli doonto in la hubiyo in GKHDH iyo xubnaha GKHDH ay qabanayaan ama ay qabteen, waajibaadkooda si waafaqsan sharciga loona sameeyey ujeedadii loogu talagalay loona sameeyey GKHDH. Hadii aaney Islaxisaabtani jirin, dadka aaminsan in GKHDH ama xubnaha GKHDH ay ku xadgudbeen waajibaadkooda khuseeya xalinta khilaafaadka dhulku ma heli doonaan farsamo oo ay isticmaalaan si ay u helaan magdhow waxaaney taasi u horseedeysaa GKHDH in ay lumiyaan aaminida iyo kalsoonida dadweynaha.

Mabda'a islaxisaabtanku wuxu u baahan yahay in GKHDH ay yeeshaan nidaam ku filan oo ka kooban:

- ❖ Xeer anshax dhamaystiran oo qeexaya xeerar anshax oo qeexan faahfaahsana, waajibaadka xubnaha GKHDH ee ku saabsan maamulka iyo go'aan qaadashada kiisaska GKHDH, iyo qaybaha anshax marinta ee lagu soo rogayo xubnaha GKHDH ee ku xadgudba xeerarka anshax ee la qeexay iyo waajibaadka.
- ❖ Habka iyo habraacyada loogu talagalay soo gudbinta iyo soo gudbinta cabashooyinka dadweynaha ee ka dhanka ah xubnaha GKHDH; iyo
- ❖ Habraaca iyo habka baadhitaanka, dhegaysiga, iyo go'aan qaadashada cabashooyinka dadweynaha ee ka dhanka ah xubnaha GKHDH.

Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay wuxuu aqoonsanyahay muhiimada mabda'a islaxisaabtanka nidaamka GKHDH, wuxuuna

bixiyaa qodobbo cayiman si loo dejiyo habraaca loola xisaabtamayo xubnaha GKHDH. Qodobka 15aad ee xeerka GKHDH ee wax laga bedelay wuxuu qeexayaa xeerarka koobaya islaxisaabtanka. Sida ku cad qodobkan xeerka, xeer anshaxa iyo xeerka anshaxmarinta garsoorayaasha Somaliland waa, in ilaa inta suurtagal ah, la hirgeliyo si xubnaha GKHDH loola xisaabtamo marka ay maareeyaan go'aana ay ka gaadhaan khilaafaadka hoos imanaya awoodooda-maamul. Golaha Sare ee Garsoorka Somaliland waa hay'ada mas'uulka ka ah in ay qabto kalana xisaabtanto wixii anshaxumo ah xubnaha GKHDH. Xubnaha GKHDH waa in ay aqoon u leeyihiin xeerarka iyo habraacyada ku jira xeerka anshaxa iyo xeerka anshaxmarinta garsoorayaasha Somaliland ee ay tahay in ay ilaaliyaan.

CUTUBKA 2AAD. AWOODDA MAAMUL EE GUDIYADA KHILAFAADKA DHULKA



1.1 Awoodda maamul Garsoorid ee Gudiyada

Sharci nambor 17/2001 iyo xeerka wax ka bedelka lagu sameeyeyba waxay sheegayaan awoodda garsoorid ee GKHDH. Awoodda garsoorid ee GKHDH wuxuu leeyahay laba

qaybood: Awood maamul shay iyo awoodda maamul dhuleed. Ka hor inta aan la dhegaysan oo go'aana laga gaadhin khilaafka loo keeney, waa in GKHDH ay hubiso in ay leedahay awoodda maamul shay iyo awoodda maamul dhuleed ee ku saabsan arinta khilaafka si waafaqsan Qodobka 6 ee Xeerka sida hoos ku sharaxan.

1.2 Awood maamul shay

Awood maamul shay waxa loola jeedaa awoodda maamul ee Gudiga ee mawduuca iyo arinka la iskukhilaafsanayay. Awood maamul shay ee GKHDH waxay ku jirtaa 28 (5) ee Sharci nambor 17/2001, oo sheegaysa in GKHDH ay awood maamul u leeyihiin khilaafaadka dhulka magaaloyinka. Qodobka 6 (2) ee Xeerka wax laga bedelay wuxuu sii faahfaahinayaa Awood maamul shay ee GKHDH, waxuuna sheegayaa in: GKHDH waxay ka garsooraan khilaafaadka ku saabsan lahaanshaha, haysashada, isticmaalka, iibinta iyo wareejinta dhulka magaaloyinka ee hoos yimaada awoodda maamul ee Maxkamadaha darajada kowaad ee dalka".

Maxaa loola jeedaa "khilaaf ku saabsan maamulka dhulka magaaloyinka"?

Khilaafaadka maamulka dhulka magaaloyinka ee hoos imanaya awoodda shay ee GKHDH waa khilaafyada ka imaanaya go'aanada maamulka iyo/ama ficilada ay qaadeen hay'adaha Dawladda iyo maamulada hoos imanaya Sharci nambor 17/2001. Waxaana ku jira maamulada Dawladdaha Hoose iyo

Golayaasha Degaanka.

Tusaale: Maamulka Dawladda hoose wuxuu awood sharci u leeyahay in uu dalbado canshuur laga soo qaado mulkiilaha aan dhulkiisa weli la dhisin ka dib markii mudada sharciga ah ee loo cayimay lagana filayo in ay iibsadayaasha dhulku ay taagaan dhisme rasmi ah. Maamulada Dawladda Hoose waxay kaloo xaq u leeyihiin in ay ka dalbadaan mulkiilayaasha beeraha hoos yimaada qorshaha magaalada in ay Dawladda siiyaan baloodho u dhigma 30% ka mid ah dhul-beereedkaa si loogu qoondeeyo danta guud ee dadweynaha. Maamulka Dawladda Hoose waxay GKHDH ka furan karaan kiis khuseeya waajibaadkan sharci. Khilaafaadka ka yimaada go'aanada maamulka oo kale ayaa ah "khilaaf khuseeya maamulka dhulka magaaloyinka", taas oo GKHDH ay awood shay u leeyihiin in ay dhegayaan oo xaliyaan.

Dhulkee baa ah dhul magaalo?

Dhulka magaalooyinka laguma qeexin sharci nambor 17. Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH waxa ku jira qeexitaanka soo socda:

Dhulka magaalooyinka waxa loola jeedaa dhul ku yaala magaalooyinka, oo lagu qeexay "meel banaan oo lagu tilmaamayo dhul baloodheysan iyo goobo si joogto ah loo degayo ayna jiraan qorsho dhab ah ama loo qorshaynayo kaabayaal iyo adeeyo sida wadooyin, koronto, bulaacado iyo nidaamyada biyaha iyo fayadhowrka."

'Qorshaynta bixinta kaabayaasha;' ee Somaliland waxa hoos gala dhul kasta oo ku jira naqshadda guud ee uu soo saaray xafiiska qorshaynta magaalooyinka ee Wasaarada Hawlaha Guud taas oo waafaqsan Xeerka maamulka dhulka magaalooyinka. Meesha aanu ka jirin naqshad guudi, wuxuu ku jiraa dhulka hoos yimaada qorshaha magaalada ee waaxda dhulka ee golaha degaanka. Meesha aanu ka jirana, astaamaha dhulka magaalo waa in la cadeeyo xaqiiqo ahaan, iyada oo la tixgelinayo xadiga lagu deganyahay, horumarka kaabayaasha iyo adeegyada ka jira.

1.3 Awoodda maamul dhuleed

'Qorshaynta bixinta kaabayaasha;' ee Somaliland waxa hoos gala dhul kasta oo ku jira naqshadda guud ee uu soo saaray xafiiska qorshaynta magaalooyinka ee

Wasaarada Hawlaha Guud taas oo waafaqsan Xeerka maamulka dhulka magaalooyinka. Meesha aanu ka jirin naqshad guudi, wuxuu ku jiraa dhulka hoos yimaada qorshaha magaalada ee waaxda dhulka ee golaha degaanka. Meesha aanu ka jirana, astaamaha dhulka magaalo waa in la cadeeyo xaqiiqo ahaan, iyada oo la tixgelinayo xadiga lagu deganyahay, horumarka kaabayaasha iyo adeegyada ka jira.

Kadib marka la go'aamiyo in khilaafka loo keenay in uu yahay khilaaf dhul magaalo oo hoos imanaya awoodda maamul shay, GKHDH ee ay khuseeyso waa in ay sidoo kale hubisaa in ay leedahay awoodda maamul dhuleed ee khilaafka. Awoodda maamul dhuleedka GKHDH wuxuu khuseeyaa goobta uu ku yaalo dhulka uu ka jiro khilaafku.

Qodobka 6 (1) wuxuu dhigayaa in mid kasta oo kamid ah GKHDH in uu ku leeyahay awood maamul dhuleed"... khilaafaadka la xidhiidha dhulka magaalooyinka ee ku yaala juqraafi ahaan aaga ay matalayaan xubnaha golaha degaanka ee degmada ay GKHDH ay ku taalo."

Marka la go'aaminayo in ay awood u leeyahay in ay go'aamiso khilaaf khaas ah oo loo keenay, GKHDH ee ay khuseeyso waa in ay hubisaa in ay u leeyahay awood maamul shay iyo awood maamul dhuleedba.

2.1 Khilaafyada laga reebay awoodda maamul ee Gudiga Khilaafaadka Dhulka.

Waxa jira khilaafyo dhuleed gooni ah oo laga reebay awoodda maamul ee GKHDH. Qodobka 6 (4) ee Xeerka wax laga bedelay

ee GKHDH wuxuu liisgaraynayaa kowan ka reeban khilaaf ahaan lana xidhiidha:

- ❖ Dhulk horey ay go'aan uga gaadhey maxkamadi; ama
- ❖ Daaqsiin, seero ama dhul beereed; ama
- ❖ Dhul ay xalintiisu socoto;
- ❖ Dhul ku yaala meel ka baxsan xuduudaha maamulka ee Golaha Degaanka maxaliga.



Khilaafaadka kor ku xusan ee laga reebay awoodda maamul ee GKHDH waxa loo qaybin karaa laba qaybood: khilaafyo aanay GKHDH awood u lahay in ay dhegaystaan, iyo kuwa ay tahay in ay diidaan in ay dhegaystaan. Hadii kiisku hoos yimaado qaybta kowaad loo keeno GKHDH, waxa GKHDH looga baahan yahay in ay kiiskaas diidaan oo sababtuna tahay in aaney u lahayn awood maamuul. Hadii ay GKHDH dhegaysato go'aana ka soo saarto kiis hoos imanaya qaybtan, go'aankaasi ma yeelanayo wax saameyn sharci ah.

Nooca labaad ee khilaafaadka laga reebay awoodda maamul ee GKHDH waa khilaafaadka ay GKHDH awood maamul u leedahay in ay maqasho go'aana ka gaadho, laakiin uu jiro xaal ka hor istagaya GKHDH in ay dhegaystaan kiiska ilaa xaaladdasi ay dhamaato. Tani waa marka khilaaf loo keenay Gudiga uu weli hor yaalo odayaasha ama dhexdhexaadin dib-u-heshiisiineed. Marka ay xaaladdani jirto, waa in ay GKHDH ay diidaan in ay dhegaystaan khilaafka, oo ay sugaan natiijada dhexdhexaadinta socota. Hadii ay dhexdhexaadintu guuldareysato sababtay doonto ka ahaatee, GKHDH waxay maqli karaan go'aana ka gaadhi karaan khilaafka.

2.2 Dariiqooyinka gudbinta ee u dhexeeya Maxkamadaha iyo GKHDH.

Xaaladdaha qaarkood, waxa ay lagama maarmaan u tahay GKHDH in ay dib u dhigto dhegaysiga iyo in ay khilaafka u gudbiso maxkamadda madaniga ee caadiga ah si ay u go'aamiso khilaafka ama arin khaasa oo khilaafka. Sidoo kale, waxa suurto ah in maxkamadda madaniga ee caadiga ahi ay u gudbin karto kiis maxkamadeed madani ah ama arin gaar ah oo dacwad madani ah GKHDH ee ay khuseeya si ay u go'aamiso go'aana uga gaadho. Xaaladdaha ay tahay in GKHDH ay gudbiso khilaafka ama arimo khaas ah ee khilaafka dhulka magaalooyinka waxay ku jiraan Qodobka 7aad ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay oo sheegaya sida soo socota:

"Gudiyadu waa in ay kiisaska u gudbiyaan maxkamadda mar kasta oo ay la noqoto in maxkamadda caadiga ahi ay kaga haboontahay in ay go'aamiso kiiska oo dhan ama arin gaar ah ama arimo kiiska ah, sida ku cad Sharciyada lagu dhiqi karo iyo shuruudaha soo socda:

1. Marka kiiska loo gudbiyey GKHDH uu khuseeyo arin dembi ama arin, waa in

loo gudbiyaa maxkamad karti u leh in ay baadho go'aana ka gaadho arinta dembiga.

2. Marka khilaafka hor yaala gudigu uu khuseeyo arin ka baxsan awooddeeda maamul, waa in gudigu kiiska oo dhan u gudbiyaa maxkamad karti u leh si ay u dhegaysato go'aana uga gaadho.
3. Marka kiisku hor yaala Gudiga uu khuseeyo arin hoos imanaya awood maamuleedka Maxkamadda u baahan in horta go'aan laga gaadho iyo kahor arinka nuxurka khilaafka, markaa waa in gudigu arinka u gudbisaa maxkamad madani karti u leh si ay u go'aamiso."

Waxa jira sadex xaaladood oo ay tahay in gudigu u gudbiso kiiska maxkamadda madanigeed caadiga ah.

Xaaladda ugu horeysa waa marka khilaafka la hor keeno gudiga uu khuseeyo arin dembi ama arin. Maadaama aanay gudiyadu lahayn awood maamul ay ku garsooraan kuna go'aamiyaan arimaha la xidhiidha dembiyada, waxa looga baahanyahay in ay gudbiyaan khilaafaadka ku lug leh dembiyada maxkamad dembi oo caadi ah kartida u leh in ay baadho go'aana ka gaadho arinta dembiga laysku eedeeyey. Xaqiiqooyinka kiiskan mala awaalka ah ee soo socda ayaa ah tusaale ahaan xaaladdaha ay tahay in gudigu ay u gudbiso khilaafka maxkamad dembi oo karti leh:

Xaalad 1aad: Cabasho khilaaf dhulka oo loo soo bandhigay GKHDH dukumenti lahaansho

si loo cadeeyo sheegashadiisa / sheegashadeeda lahaanshaha dhulka. Ladacweeyuhu wuxuu ku doodayaa in dukumintiga uu soo bandhigay dacwooduhu uu yahay mid foojari ah iyo been abuur khiyaano ah. Been abuurka khiyaanada ahi waa dembi ciqaabeed sida ku xusan Xeerka Ciqaabta ee Somaliland. GKHDH uma laha awood maamul dembiyada ciqaabta. Maxkamadaha caadiga ah ayaa leh awoodda maamul. Sidaa daraadeed GKHDH waxa looga baahan yahay inay dib u dhigto dhegaysiga khilaafka iyo in ay kiiska u gudbiso maxkamadda dembiyada ee kartida u leh in ay go'aamiso arinta dembiga ee khilaafka. Kiiska khilaafka dhulka wuxuu qabyo ku sii ahaan doonaa GKHDH ilaa iyo inta ay maxkamada ciqaabt ee kartida u lihi ay bixinayso go'aan kama dambeys ah oo la xidhiidha fojariga. MKHD waxay dib u bilaabi doontaa dhegaysiga khilaafka dhulka marka la helo xukunka kama dambaysta ah ee maxkamadda dembiyada. Go'aanka maxkamadda dembiyadu wuxuu cadayn u noqonayaa go'aaminta arimaha lahaanshaha dhulka ee la isku khilaafsanyahay.

Xaaladda labaad ayaa ah marka khilaafka loo keeno Gudiga uu khuseeyo arimaha madaniga ah ee ka baxsan awoodda maamul ee GKHDH. Xaaladdahaas oo kale, waa in GKHDH ay kiiska oo dhan u gudbiyaan maxkamad madani ah oo karti u leh si ay u go'aamiso.

Tixgeli xaqiiqooyinka soo socda oo muujinaya khilaaf khuseeya arin ka baxsan awoodda maamul ee Gudiga:

Xaalad 2aad: Kiis la xidhiidha khilaaf ku saabsan lahaanshaha dhulka magaaloyinka oo laga diiwaangeliyey GKHDH ee Hargeysa, dacwooduhu wuxuu ku dooday in dhulka la isku khilaafsanyahay uu ku helay dhaxal lagu wareejiyey dardaaran sax ah. Ladacweeyuhuna wuxuu ku dooday in aaney jirin wax dardaaran ah, iyo in dhulka la isku khilaafsanyahay ay si isku mid ay isaga iyo dacwooduhu uga wada dhaxleen aabahood. Waxu ku doodayaa in dhulka ay si wadajir ah u wada leeyihiin isaga iyo dacwooduhu.

Khilaafkani wuxuu la xidhiidhaa khilaaf dhul magaalada. Hasayeeshe, arinka ugu weyn ee kiiskani waa in la go'aamiyo in dacwooduhu uu ku helay lahaanshiyaha dhulka dardaaran sax ah, ama in dhulku yahay dhul ay si wada jir ah u dhaxleen dhinac iskhilaafsan. GKHDH ma ah goobta ku haboon in lagu go'aamiyo laguna xaliyo khilaafkan, maadaama ay ku saabsantahay arin dhaxal. Sidaa daraadeed, GKHDH waa in ay kiiska oo dhan u gudbiyaan maxkamad awood maamul u leh in ay qaado go'aana ka gaadho.

Xaaladda sadexaad ee ay tahay in GKHDH ay u gudbiyaan khilaafaadka maxkamadaha madaniga ah waa xaaladdaha khilaaf ee khuseeya arin ay GKHDH u leeyihiin awood maamul ay ku dhegaystaan, laakiin taas oo sidoo kale khuseeya arin hoos timaada awoodda maamul ee maxkamadaha una baahan in la go'aamiyo ka hor inta aan la xalin arinta weyn ee khilaafka. Tusaale khilaafka noocaas oo kale ayaa lagu soo koobay.

Xaalad 3aad: Khilaafku wuxuu ka saabsanyahay lahaanshaha iyo iibinta dhul magaalada. Ladacweeyuha oo ah iibiyaha dhulku wuxuu xaqiijinayaa in uu dhulka ka iibiyey dacwoodaha, laakiin wuxuu ku doodaya in wakhtigii uu/ay iibiyey/iibisey dhulka aanu/aaney qaan gaadhin awood sharcina lahayn lagu galo heshiis iib. Sidaa daraadeed ladacweeyuhu wuxuu ku doodayaa in iibka dhulkasi uu ahaa sharci daro, iyo wax kama jiraan maadaama aan lagu samayn si waafaqsan shuruucda heshiiska iibka laguna qeexay xeerka madaniga ee Somaliland. Arinta ugu weyn ee khilaafkani waa ansaxnimada iibka dhulka, taas oo ah arin aaney GKHDH ahayn goob ku haboon in lagu go'aamiyo. Sidaa daraadeed GKHDH ee ay khuseeysaa waa in ay u gudbisaa kiiska maxkamad madani ah oo karti leh si ay u go'aamiso ansaxnimada iibka dhulka la isku khilaafsanyahay. Ka dib marka ay GKHDH helaan go'aanka kama dambaysta ah ee maxkamadda ee ku saabsan ansaxnimada iibka dhulka, waxay bilaabi doontaa dhegaysiga ku saabsan lahaanshaha dhulka. Xukunka maxkamadda ee ansaxnimada iibku wuxuu noqonayaa cadayn ay tahay in GKHDH ay tixgeliso markay go'aan ka gaadheyso lahaanshaha dhulka la isku khilaafsanyahay.

CUTUBKA 3AAD. HABRAACA FAYLGARAYNTA IYO FURITAANKA KIISASKA GKHDH

3.1. Habraaca loo furayo kiisaska GKHDH

3.1.1 Xareynta codsiga/cabashada kiiska

Qof kasta oo danaynaya in uu ka furto kiis GKHDH waxa looga baahanyahay in ku xareeyo Xafiiska Xog-haynta ee GKHDH codsi qoraal ah oo si cad u sheegaya dhamaan macluumaadka ku qoran Qodobka 25 (1) ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay, xagan hoosana ku taxan:

- ✓ Magaca iyo qeexitaanka Gudiga kiiska loo gudbiyay;
- ✓ Magaca oo dhameystiran, goobta deganaanshaha, iyo cinwaanka dacwoodaha, hadii dacwooduhu uu matalayo dhinac kale, ama dhican kale ay matalayso dacwoodaha, waa in ay sheegaan magaca buuxa ee wakiilka ama qofka la matalayo;
- ✓ Magaca oo dhameystiran, goobta deganaanshaha, iyo cinwaanka la dacweeyaha. Meeshii ay khuseeyso hadii isaga / iyad uu matalayo qof kale ama isaga / iyada ay matalayaan cid kale magaca qofka matalaya oo dhameystiran waa in la sheego.
- ✓ Hadii mid ka mid ah labada dhinac ee kiiska uu yahay shirkad ama hay'ad, magaca shirkada iyo xarunteeda,
- ✓ Cabirka, jihooyinka, namberka baloodhka, hadii uu jiro, iyo goobta dhulka la isku khilaafsanyahay; iyo
- ✓ Mawduuca khilaafka ee ay tahay in gudigu xaliso.

Ujeedada bixinta macluumaadkani waa in loo suurtageliyo in GKHDH ay si fudud u go'aamiso cida iskhilaafsan, macluumaadka halka lagala xidhiidhi karo, meesha u ku yaalo

dhulka la isku khilaafsanyahay, iyo khilaafka ay tahay in la xaliyo. In dacwooduhu GKHDH siiyo dhamaan macluumaadka kor ku xusan oo cad si sahlana loo fahmi karo waxay aasaasi u tahay dhegaysiga si dhakhso u xalinta kiiska. Hadii aanu dacwooduhu u keenin dhamaan macluumaadka sharci ee kor ku qoran oo cad si sahlana loo fahmi karo, waxay keeni kartaa in habku dheeraado oo dhib ku ah xaqa ay dhinacyadu ay u leeyihiin in kiiskooda lagu dhegaysto wakhti ku haboon iyo hufnaan.

Su'aalaha ay tahay in la tixgeliyo

- Sideebay GKHDH ay u hubin karaan in dadwaynuhu ogyihiin shuruudaha looga baahan yahay in cabasho loo gudbiyo GKHDH?
- Sideebay GKHDH ay u hubin karaan in qof uun, gaar ahaan dadka aan wax qorin, ay heli doonaan fursad ay ku gudbiyaan kiisna ay ku faylgareeyaan GKHDH, iyada oo aaney u baahnayn in ay qabsadaan garyaqaan ka caawiya qorista cabashada / codsiga kiiskiisa?

3.1.2. Hubinta waafaqsanaanta, celinta iyo diidmada cabashada/codsiga kiiska

Marka la helo codsiga kiiska, Xoghaynta GKHDH waa in ay hubisaa in codsiga si buuxda oo sax ah lagu buuxiyey dhamaan macluumaadka looga baahan yahay sida ku cad qodobka 25 (1) ee Xeerka GKHDH. Hadii codsigu aanay ku jirin qaar ka mid ah, ama dhamaan macluumaadka loo baahan yahay, Xoghaynta ayaa ku soo celin doonta codsiga dacwoodaha kuna wargalinaya isaga/iyada qaybaha maqan ee loo baahan yahay in lagu

dar, iyo sidoo kale xaqa ay u leeyihiin in dib u soo gudbistaan codsiga ka dib marka ay si haboon oo sax ah u buuxiyaan (Eeg Qodobka 25 (2) ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH).

Hadii codsiga loo qoro si waafaqsan shuruudaha oo dhamaan macluumaadka loo baahanyahayna la geliyo, Xoghayntu waa in ay ku amarta codsadhaha in uu bixiyo khidmada codsiga kiiska. Hadii codsaduhu aanu awoodi karin in uu bixiyo khidmada codsiga kiiska, Xoghayntu waa in ay ku wargalisaa codsadhaha xaqa uu u leeyahay in laga dhaafi karo khidmada una sharaxdo habka loo baahan yahay si loo helo canshuur dhaafkaas (Ka eeg Qodobka 25 (3) ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH).

Xoghaynta waxa kaloo looga baahanyahay in ay hubiso in codsiga la qabtay uu la xidhiidho khilaaf hoos iman kara awoodda maamul ee GKHDH. Hadii uu codsigu la xidhiidho khilaaf aaney GKHDH u lahayn awood maamul ay ku dhegayaan kuna go'aamiyaan waa in si waafaqsan Qodobka 6aad ee Xeerka GKHDH ay Xoghaynta u soo saarto amar qoraal ah oo sababaynaya sidoo kalena diidaya codsiga (Eeg Qodobka 25aad (6) Xeerka LDT Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH). Xoghayntu waxa looga baahanyahay in ay codsadhaha siiso nuqulka amarka diidmada loona sheego xuquuqda ay u leeyihiin in ay rafcaan u qaataan Maxkamadda Sare muddo 15 cisho gudahood ah laga bilaabo taariikhda amarka diidmada (Eegi Qodobka 25 (7) ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH). Hadii rafcaan la qaato oo Maxkamadda Sare ay amarto in GKHDH ay dhegaysato kiis noocaas ah, Xoghayntu marka ay hesho amarka ka yimi

Maxkamadda Sare, waa in ay markaas diiwaangeliso kiiska.

3.1.3. Diiwaangelinta iyo furitaanka faylka kiiska

Kadib ansixinta waafaqsanaanta codsiga kiiska iyo hubinta in khidmadaha codsiga dacwada la bixiyay, ama ay GKHDH ay ogolaadeen in khidmada kiisaska laga dhaaf, Xoghaynta ayaa sii wadi doonta diiwaangelinta codsiga kiiska. Xoghayntu ayaa siinaysa kiis aqoonsi, amraysana Shaqaalaha Xoghaynta in ay kiiska geliyaan Diiwaanka GKHDH, dabadeedna codsiga u furaan fayl kiis (Eeg Qodobka 25aad (4aad iyo 5aad) ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH).

Marka la diiwaangelinayo codsiga kiiska, macluumaadka soo socda ee ku saabsan codsiga kiiska waxa lagu qori doonaa diiwaanka kiiska ee GKHDH: Lambarka kiis aqoonsi, taariikhda diiwaangelinta, magacyada oo dhamaystiran iyo cinwaanada dhinacyada kiiska, iyo magacyada wakiillada, hadii ay jiraan, cabirka iyo goobta dhulka la isku khilaafsanyahay, iyo cadadka khidmada kiiska ee la bixiyay, ama khidmada laga dhaafay, hadii laga dhaafay. Kadib diiwaangelinta kiiska, waxa kale oo muhiim ah in lagu diiwaangeliyo macluumaadka aasaasiga ah diiwaanka GKHDH ee ku saabsan kiiska diiwaangashan, sida xubnaha Gudiga GKHDH ee loo xilsaaray in ay dhagayaan kiiska, taariikhda la xaliyay, taariikhda rafcaanka, hadii rafcaan la qaatai, iyo taariikhda iyo natiijada rafcaanka la helay.

Macluumaadka ay tahay in la geliyo diiwaanka kiisaska GKHDH waxa ka mid ah:

- ✓ Lambarka tixraaca kiiska.
- ✓ Taariikhda diiwaangelinta.
- ✓ Magaca oo dhamaystiran/ magacyada la dacweeyaha ama dacweeyayaasha/ cinwaanka ama boostada ama loogu hagaajinayo/da'dooda.
- ✓ Goobta, cabirka, jihada dhulka la isku khilaafsanyahay.
- ✓ Dabeecadda kiiska/khilaafka.
- ✓ Inta khidmad ah ee la bixiyay, ama inta khidmad ah ee laga dhaafay.
- ✓ Magacyada xubnaha GKHDH ee loo xilsaaray kiiska.
- ✓ Taariikhda ay GKHDH ay go'aanka gaadheen iyo cidii ku guuleysatay, iyo
- ✓ Hadii racfaan laga qaatay iyo taariikhda racfaanka.

Diiwaangelinta marka la sameeyo, shaqaalaha Xoghaynta ayaa kiiska diiwaangashan u furi doona fayl kiisk. Faylka kiiska loo furay kiiska diiwaangashan wuxuu noqonayaa faylka loo qoondeeyey kiiska, waana in uu ku jiraa codsiga kiiska, iyo dhamaan dukumiintiyada mustaqbalka iyo diiwaanada khuseeya kiiska (Eeg Qodobka 25aad (5) ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH). Xaga sare ee diiwaanka kiiska, waa in dhamaan xogta la geliyey ee khuseeya kiiska la taxo, oo ay ka mid yihiin: aqoonsiga kiiska, nooca kiiska, magacyada iyo cinwaanada dhinacyada, dhulka la isku khilaafsanyahay iyo goobta uu ku yaalo, iyo cadadka khidmada ee la bixiyey, iwm.

Macluumaadka ay tahay in lagu dul qoro faylka kiiska:

- ✓ Lambarka tixraaca kiiska.
- ✓ Taariikhda diiwaangelinta.
- ✓ Magaca oo dhamaystiran/ magacyada la dacweeyaha ama dacweeyayaasha/ cinwaanka ama boostada ama loogu hagaajinayo/da'dooda.
- ✓ Goobta, cabirka, jihada dhulka la isku khilaafsanyahay.
- ✓ Nooca kiiska/khilaafka.
- ✓ Inta khidmad ah ee la bixiyay, ama inta khidmad ah ee laga dhaafay;
- ✓ Taariikhda fayl kiiska la furay, iyo
- ✓ Magacyada xubnaha GKHDH ee loo xilsaaray kiiska.

Kadib diiwaangelinta iyo furitaanka kiiska faylka kiiska ee codsiga la helay lana ansixiyey, Xoghayntu waxay Gudoomiyaha GKHDH u gudbin doontaa faylka kiiska oo ay ku jiraan codsiga kiiska, si loo ansixiyo, loo magacaabo, loona xilsaaro koox Gudi ah si ay u dhagaystaan kiiska. Kadib marka la ansixiyo ansaxnaanta codsiga kiiska, Gudoomiyuhu waa in uu qoro magacyada kooxda Gudiga ee loo magacaabay loona xilsaaray in ay dhegaystaan kiiska, iyada oo faylka kiiska lagu muujinayo xubinta hogaaminaysa kooxda Gudiga. Dabadeed, Gudoomiyaha GKHDH wuxuu xoghaynta u celinayaa faylka kiiska si ay u diyaariso una siiso ogaysiis kiis la dacweeyaha si uu u qaado talaabooyin lagama-maarmaanka u ah diyaarinta dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska (Eeg Qodobka 25aad (8) ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH).

3.2. Ogeysiiska kiiska iyo Habraaca Adeega

Ka dib marka uu Gudoomiyaha GKHDH uu ansixiyo codsiga una xilsaaro koox gudi ah kiiska, Xoghayntu waxay diyaarin doontaa ogeysiiska kiiska si loogu siiyo looguna geeyo ladacweeyaha kiiska si waafaqsan habka ku qoran Qodobka 27 ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH. Qodobka la soo xigtay ee xeerku wuxuu dejinayaa talaabooyin loo raaco diyaarinta iyo hababka bixinta amarada ogeysiiska kiiskae ee la siinayo la dacweeyaha ay khuseeyso, oo ah kuwa soo socda:

1

Xoghayntu waxay hubinaysaa in telefoon moobilka la dacweeyaha la garanayo lana heli karo, iyo, hadii la heli karo, in lala hadlo oo fariin SMS ah loo dir la dacweeyaha lana ogeysiiyo dacwada lagu soo oogay isaga/iyada iyo in isla mar ahaantaana la amro in uu yimaado Xafiiska Xoghaynta Gudiga maalin iyo wakhti cayiman si uu u qaaato nuqul codsiga kiis la faylgareeyey. Hadii la dacweeyaha ama wakiilkiisu ay yimaadaan xafiiska Xoghaynta taariikhda lagu amray telefoonka iyo fariinta MSM, Xoghayntu waa in ay siisaa nuqulka codsiga kiiska si waafaqsan Qodobka 28 ee Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH.

2

Hadii telefoon moobilka la dacweeyaha aan la garaneyn ama hadii la dacweeyaha lagula Hadley moobilkiisa/keeda, laakiin uusan iman taariikhda lagu amray in uu yimaado si uu u qaato codsiga kiiska, Xoghayntu waxay diyaarinaysaa ogaysiis amar kiis lagu ogaysiinayo la dacweeyaha dacwada lagu soo oogay isaga/iyada isla markaana amar lagu siinaayo inuu/inay tago/tagto Xafiiska Xoghaynta Gudiga maalin iyo wakhti cayiman si uu uga sameeysto nuqul codsiga kiiska ee GKHDH yaala. Amarka ogeysiiska waxa kaloo looga baahanyahay in uu la xidhiidho una digo la dacweeyaha, in hadii uu iman waayo Xafiiska Xoghaynta taariikhda lagu amray, in gudigu ay dhegaysan karto go'aana ka gaadhi karto kiiskiisa isaga/iyada oo maqan. Amarka wargelinta kiiska waxaa dacweeyaha u geynaya fariin qaadaha gudiga. Waxa loo geynayaa la dacweeyaha si shaqsi ah, hadiiba la helo.

- ❖ Hadii la dacweeyaha la helo, fariin qaaduha ama cida kale ee geynaysa amarka waa in ay siiyaan la dacweehaya nuqulka amarka una sheegaan in loo baahanyahay in la dacweeyuhu uu saxeeexo kuna qoro taariikhda la siiyey xaga dambe ee nuqulka ogeysiiska. Tan waxa loo baahanyahay in lagu cadeeyo ama lagu qiro Fhelitaanka amarka. Nuqulka noocaas oo kale ee amarka uu saxiixay la dacweehuhu waa in uu ahaadaa
- ❖ Xoghaynta laguna faylgareeyo faylka kiiska ee haboon.
- ❖ Hadii la helo la dacweeyahaya, laakiinse uu diido in uu qaato

amarka ogaysiinta, fariin qaadaha ama cida geynaysa waa in ay ogaysiiyaan laba markhaati oo markhhati ka noqda diidmada la dacweeyaha iyaago saxiixaya xaga dambe ee amarka ogaysiinta. Cida geynaysa amarka ogeysiisku waa in uu ku wargeliyaa Xoghaynta diidmada isagoo soo gudbinaya nuqulka amarka ogeysiinta ay saxeexeen labada markhaati. Nuqulkaas waa in lagu faylgareeya faylka kiisaas ee loo furay kiiskaas.

3

Hadii la dacweeyaha la waayo, ama uu dalka ka maqanyahay, amarka ogaysiiska kiiska waxa la gaynayaa guriga, goobta ganacsiga, ama xarunta shaqada ee la dacweeyaha iyadoo loo gaynayo qof masuul ah ama qaandhaadh ah oo lagu aamini karo in uu ogaysiiska siiyo la dacweeyaha. Sida, lamaane. Walaal, ama ehel dhow oo la nool la dacweeyaha, maamulihisa / maamulaheeda shaqada, qof kamid ah shaqaalihisa jooga ganacsigiisa / ganacsigeeda, ama qof kale haysta, isticmaala ama masuul ka ah dhulka la isku khilaafsanyahay. Qofka loo dhiibo amarku waa in uu saxeexo nuqulka amarka ogaysiiska oo ah qiraal in la dacweeyaha uu u qaaday amarka.

4

Hadii la dacweeyaha la waayo, ama uu dalka ka maqanyahay, oo amarka ogaysiiska la waayo qof loogu dhiibo iyo meel loo dhigana, Xoghayntu waxay amarka ogaysiiska u diraysaa sanduuqa boostada ama boostada ama emailk u diiwaangasha, hadii la garanayo cinwaana saxda ah ee la dacweeyaha ama waxa loo marinayaa mediyaha. Marka amarka ogaysiiska la diro, Xoghayntu ayaa diraarinaysa nuqulka amarka ogaysiiska oo uu la socdo qoraal sheegaya nidaamka lagu bixiyay iyo taariikhda loo diray la dacweeyaha oo ay tahay in lagu faylgareeyo fylka galdacwadeedka ay khusayso.

Arin kale oo muhiim ah ayna tahay in la tixgeliyo marka la dacweeyaha loo dirayo amarka ogeysiinta waa dejinta iyo wakhtiga loo qabtay ee loo baahanyahay in la dacweeyuhu uu ku yimaado oo qaato nuqulka codsiga kiika laga soo gudbiyey isaga/iyada. Tani waa awood iyo ikhtiyaar la siiyey Xoghaynta Gudiga. Laakiinse, marka go'aan laga gaadhayo wakhtiga loo qabtay ee ogeysiiska kiiska, waa in Xoghayntu ay maanka ku hayso xuquuqda ay dhinacyadu u leeyihiin in ay helaan gudigayn wakhti go'an kama dambaysna ah. Si loo turjumo xuquuqdan aasaasiga ah ee dhinacyada, Xeerku wuxuu qoray shuruudaha ay tahay in Xoghayntu ay si adag u raacdo marka ay dejinayso mudada ogeysiiska. Xoghaynta waxa looga baahanyahay in ay tixgelin gaar ah siiso habka ugu suurtoogalsan ee lagu bixin karo ogeysiiska, goobta iyo helitaanka la dacweeyaha, iyo isla markaana la hubiyo in ogeysiisku aanu ka badnaan 10 cisho marka

uu la dacweeyuhu uu deganyahay dalka, ama 30 cisho marka uu la dacweeyuhu uu ka maqanyahay dalka.

Hadiiba, sida ku qoran amarka ogeysiiska, uu la dacweeyuhu yimaado Xafiiska Xoghaynta Gudiga, Xoghayntu iyadoo la tashanaysa madaxa Gudiga ee Gudiga ay khuseeyso, waxay qoondenaysaa taariikhda kulanka kowaad ee dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska. Waxay qaadayaan talaabooyinka soo socda ee hoos yimaada waafaqsana Qodobka 28aad Xeerka wax laga bedelay ee GKHDH:

- ❖ Sii la dacweeyaha nuqulka codsiga kiiska isaga/iyada lagu oo oogay, una sheeg in looga baahanyahay in ay saxiixaan taariikhdana ku qoraan si loo xaqiijiyo helitaanka codsiga kiiska. Isla mar ahaantaana, u sheeg taariikhda dhegaysiga hordhaca ee kiiska, iyada oo sidoo kale looga digayo in hadii aanay iman dhegaysiga, in gudugu dhegaysan karto go'aana ka gaadhi karto kiiskiisa isaga/iyada oo maqan; iyo
- ❖ Ogeysii dacwoodaha taariikhda dhegaysiga hordhaca ah sidoo kalena u dig in gudigu ay go'aan ka gaadhi karto khilaafka isaga/iyada oo maqan, waa hadii ay iman waayaan taariikhda loo qabtay dhegaysiga.

Hadii amarka ogeysiiska la dacweeyaha loo siiyey si haboon iyo si waafaqsan qodobka 27aad ee kor ku xusan, la dacweeyuhuse uu diido in uu qaato oo uu qirto helitaanka amarka ogeysiiska, ama uu iman waayo, sabab macquul la'aan, Xafiiska Xoghaynta ee Gudiga si uu u qaato nuqulka bayaanka sheegashada, sida lagu amray ogeysiiska,

Xoghayntu waxay qabanaysaa taariikhda dhegaysiga hordhaca ee kiiska sidoo kalena ogaysiinaysa dacwoodaha taariikhda la qabtay.

Hadii lagu qanco in amarka ogeysiiska aan loo siin la dacweeyaha si waafaqsan Xeerka GKHDH ama ay jirtay sabab macquul ah oo

Kuwa soo socda waxay ka mid yihiin xaaladdaha caadiga ah ee ay tahay in Xoghayntu go'aansato in amar ogaysiinta aan lagu bixin si haboon oo waafaqsan Xeerka ama in ay jirto sabab macquul oo keentay maqnaanshaha la dacweeyaha, sida hadii:

- ❖ Habka bixinta loo adeegsaday ayaa ka soo horjeeday habka ay tahay in loo bixiyo ee ku qoran Xeerka. Tusaale ahaan, ka hor inta aan la isku dayin helida la dacweeyaha si loo siiyo amarka ogaysiiska si shakhsiyan ah, fariinqaaduhu wuxuu amarka ogaysiiska geeyay guriga ama goobta ganacsi ee la dacweeyaha.
- ❖ Amarka ogeysiiska waxa la siiyay oo loo dhiibay qof aan qaan gaadhin ama aan xidhiidh la lahayn laguna kalsoonaan karin in uu ogaysiiska siin doono la dacweeyaha.
- ❖ Taariikhda uu la dacweeyuhu helay amarka ogeysiisku wuxuu aad ugu dhowyahay taariikhda lagu amray in uu yimaado Xafiiska Xoghaynta wakhti ku filana muu helin si uu u yimaado sida la amray.
- ❖ La dacweeyuhu wuxuu la xiidhiidhay Gudiga una sheegay in isagu/iyadu iman karin wakhtiga loo qabtay uuna soo jeediyay taariikhda uu/ay ku iman karo/karto, ama
- ❖ Qofka loo dhiibay dukumiintiga si ay u siiso dhinac ayaa u sheegay Gudiga ama fariinqaadahii keenay amarka, in dhinaci uu maqanyahay oo aanu iman doonin ka hor taariikhda la dalbaday.

uu u maqnaa la dacweeyuhu, Xoghayntu waa in ay diyaarisaa amar qoraal ogaysiis kiis oo qoraal ah oo la siiyo la dacweeyaha si waafaqsan Qodobka 27 ee Xeerka GKHDH. Marxaladan, waxa jira su'aalo aad u muhiim ah oo loo baahanyahay in laga jawaabo. Goorma ayay Xoghayntu go'aan ku gaadhi kartaa in amarka ogaysiisku aanu habooneyn sidoo kalena waafaqsanayn Xeerka ee la siiyay la dacweeyaha, ama amarka ogeysiiska waxa lagu siiyay si waafaqsan Xeerka, laakiinse sababo macquul ayaa ka hor taagan in la dacweeyuhu uu yimaado sida ku qoran amarka ogaysiiska?

CUTUBKA 4AAD: HABRAACA DHEGAYSIGA KIISASKA IYO GO'AAN QAADASHADA

Qaybta I: Xeerarka Guud


4.1. Xeerarka Guud

Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay wuxuu qeexayaa xeerarka guud ee ay tahay in la ixtiraamo ayna hirgeliyaan GKHDH dhamaan kulamada dhegaysiga iyo dhamaan marxaladaha hababka dacwada khilaafaadka dhulka ay sameeynayaan. Mabaadi'da uu bixiyay xeerku ee hoos ku sharaxani waxay waxtar iyo lagama maarmaan u yihiin hubinta in GKHDH ay go'aamiyaan ayna ku xaliyaan khilaafaadka si daahfurnaana, waqkhti go'an, iyo qaab cadaalad ah.

4.1.1. Dhegaysiga furan iyo ka dadweynaha

Sida lagu soo koobay Qodobka 29aad ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay, marka laga reebo xaalado ay GKHDH ku qanacsanyihiin in dhegaysigu uu xidhnaado

sababo amni dartood dhamaan dhegaysiyada dacwadaha hoos imanaya GKHDH waa in ay noqdaan kulamo furan oo dadweynahu ay dhegaysan karaan. Mabda'an kulamada furan ee dadweynuhu ay dhegaysan karaan wuxuu ku salaysanyahay, oo ka tarjumaya, baahida loo qabo in la hubiyo daahfurnaanta habka dhegaysiga kiiska. Furnaanta habka dhegaysiga dacwada wuxuu dadka siinayaa fursad ay ku tagaan kalfadiyada dhegaysiga si ay u arkaan sida gudiyadu u dhegaystaan una sameeyaan dacwadaha khilaafka waxayna u saamaxaysaa in ay markhaati ka noqdaan in Gudiga ay ka go'antahay cadaaladu iyo in la aamini karo. Waxa intaa dheer, ka qaybgalka dadweynaha ee kiisaska furan ee dadweynahu dhegaystaan waa nidaam lagu cadaadinayo xubnaha Gudiga si ay ugu hogaansamaan habraaca haboon ee hirgeli kara iyo sidii looga fogaan lahaa sameynta ficilada ka hor imanaya habraacyada lagu dhiqikaro dhegaysi iyo go'aan qaadashado cadli ah.



4.1.2. Haysashada diiwaanka kiisaska GKHDH oo sax ah dhameystirana.

Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay wuxuu ku waajibinayaa dhamaan Gudiyada in ay qoraal ahaan u qoraan oo ay si haboon u hayaan dhamaan dacwadaha fadhi dhegaysi kasta ee kiis kasta oo ay dhegaystaan.

Qodobka 30aad ee Xeerku wuxuu sheegayaa sida soo socota:

"Koox kasta oo Gudi waa in ay hubiyaan in

1. Dhamaan doodaha dhinacyada, maragfurka markhaatiga, su'aalaha ay gudigu weydiinayaan dhinacyada iyo markhaatiyaasha iyo wax kasta iyo wax walba oo lagu sheegay dhegaysi kasta ee dhegaysiga dacwada kiiska waxaa lagu qorayaa qoraal la akhrin karo oo cad oo si sax ah loo diiwaangeliyo, iyo
2. In dhamaan diiwaanada qoraalka ah ee dacwadda kiiska, cadaynta dokumentiga cadaynta, amarada gudiga iyo dhamaan dokumentiyada kale ee la khuseeya kiiska lagu diiwaangeliyo oo si sax ah loo dhigo laguna hayo galka kiiska.

Sida Qodobkan xeerka lagu amray looguna baahanyahay, Gudiyada waxa waajib ku ah in ay hubiyaan in dhamaan doodaha dhinacyada, maragfurka markhaatiyada, su'aalaha ay gudigu weydiinayaan dhinacyada iyo markhaatiyaasha iyo wax kasta oo lagu sheego kulan kasta oo dhegaysi in lagu qoro qoraal la akhrin karo oo cad si sax ah loo diiwaangeliyo. Intaa waxa dheer, gudiyadu waa in ay oo waajibna ku ah in ay hubiyaan in dhamaan diiwaanada

dacwada fadhiyada dhegaysiga kiisaska in loo diiwaangeliyo si haboon lana geliyo laguna hayo gal dacwadeedka kiiska ee diiwaanka iyo dokumentiyadaas leh. Waxa ka mid ah: cadaynta dokumentiga, amarada gudiga sida dib u dhigista dhegaysiyada, ogeysiisyada iyo amarada Gudiga, iyo dhamaan dokumentiyada kale sida codsiyada kiiska, jawaabaha, iyo dokumentiyada kale ee la xidhiidha kiis walba iyo kiis walba.

Helitaanka gal dacwadeedka kiiska oo ay ku jiraan dhamaan diiwaanada ay ku qoranyihiin kulamadii dhegaysiga kiiska iyo dhamaan diiwaanada kale iyo dokumentiyada ku saabsan kiiska ee gudigu ay dhegaysatay wuxuu aasaasi iyo lagama maarmaan u yahay in:

- ❖ Uu u saamaxo GKHDH in ay helaan cadayn dhamaystiran oo la isku haleyn karo, oo ka tarjumaysa dacwadaha kiiska ay dhegaysato, si ay go'aan cadli ah u gaadho.
- ❖ Uu u saamaxo dhinacyada kiiska in ay helaan macluumaad ay ku qiimeeyaan kuna xaqiijiyaan in gudigu ay tixgelisay oo ku salaysay go'aanadeeda dhamaan doodahoodii, maragfurka markhaatiga, iyo cadaymihii lagu soo bandhigay fadhiyada dhegaysiga kiiska. Haysashada diiwaanada dhameystiran ee kiiska, dhinacyadu waxay awoodi karaan in ay qiimeeyaan go'aanka Gudiga, si markaa ay u go'aamiyaan in ay rafcaan ka qaataan iyo in kale, iyo
- ❖ Uu u saamaxo Maxkamadda Sare, iyo hay'adaha kale ee ka mas'uulka ah islaxisaabtanka iyo saxitaanka go'aamada kama dambeysta ah ee GKHDH, si loo helo warbixin dhamaystiran iyo macluumaad ay u baahan karaan si ay dib-u-eegis iyo kormeer ugu sameeyaan ficilada iyo go'aamada Gudiga.

Karaaniga Kooxda Gudigu wuxuu mas'uul ka yahay qorista diiwaanada fadhiyada dhegaysiyada, iyo inuu habeeyo oo si haboon u abaabulo dacwadda kiiska noocaas oo kale ah oo la socdo dhamaan dukumentiyada ku saabsan kiiska oo ku jira galka haboon ee kiiska. Laakiinse, si ay u gutaan waajibaadkooda, Kooxda Gudiga ee dhegaysanaysa kiiska, khaasatan xubinta gudoominaysa Gudiga, waxa laga filayaa in uu hubiyo in karaaniga caawinaya uu si fiican u qoro bayaanada iyo dhawaaqyada dhinacyada, iyo maragfurka markhaatiga ee dhegaysi kasta kulanka kiiska iyo in karaanigu uu sidoo kale dhigay oo si hufan u abaabulay dhamaan diiwaanada qoran iyo dukumentiyada kale ee kiiska⁷.

Tani sidoo kale waxay u baahantahay xubinta gudoominaysa Gudiga ee dhegaysanaya kiiska in uu si haboon u hogaamiyo dhegaysiga dhinacyada iyo markhaatiyaasha, si loo hubiyo in karaanigu uu fahmay uuna diiwaangeliyey wax kasta oo la sheegay inta lagu gudo jiray fadhiyada dhegaysiga kiisaska.

4.1.3. Dhegaysiga kiiska iyada oo ay maqanyihiin dhinacyadu

Qodobka 32aad ee xeerka GKHDH ee wax laga bedelay wuxuu aasaas u yahay xaqijinta xaq u lahaanshaha dhegaysiga dhakhso ah oo cadli ah. Qodobkani wuxuu soo jeedinayaa xeer guud oo ku waajbinaya Gudiga si aaney khilaafna dhegaysan go'aana ka gaadhin meel aanay joogin ama la

dhegaysan dhamaan dhinacyada. Si kastaba ha ahaatee, qodobku wuxuu sheegaya xaalado aan lagu dhaqayn xeerka kor ku xusan oo u xilsaaraysa ugana baahan gudiyadu in ay dhegayaan iyo/ama ay go'aan ka gaadhaan khilaafka iyada oo ay maqanyihiin dhinacyadu, kuna xidhan shuruudahan soo socda:

- ❖ Marka la dacweeyuhu uu maqanyahay cid matashaana aanay joogin dhegaysiga.
- ❖ Marka gudigu ku qanacdo in la dacweeyaha sida caadiga ah ee haboon loogu adeegay uuna helay amarka ogaysiiska kiiska iyo ogaysiiska taariikhda dhegaysiga kiiska si waafaqsan Xeerka, laakiin aanuu iman, cidina aanay wakiil uga noqon dhegaysiga iyada oo aysan jirin sabab macquul ah.
- ❖ Marka la dacweeyuhu uu maqanyahay ee uusan wakiilna u joogin dhegaysiga, gudiguna ay ku qanacsantahay in amarka ogeysiiska kiiska la siiyay la dacweeyaha si haboon oo waafaqsan Xeerka iyo in la dacweeyuhu uu diiday in uu qaato oo uu qiro helitaanka amarka ogeysiiska, ama
- ❖ Marka ay gudigu ku qanacdo in dacwooduha la ogeysiiyey taariikhda dhegaysiga kiiska sida waafaqsan Xeerka, laakiin uu ku fashilmay in uu yimaado, oo cidna aysan ku matalin fadhiga dhegaysiga iyada oo aysan jirin sababo macquul ah.

⁷ Eeg Qodobka 21 (5) ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay

Marka mid ka mid ah xaaladdaha kor ku xusan uu jiro, Kooxda Gudiga waxa looga baahanyahay in ay bilaabaan dhegaysiga ama go'aan ka gaadhaan kiiska, iyada oo aan loo eegin maqnaanshaha dhinaca maqan ee kiiska. Marka la go'aaminayo in ay tahay in la dhegaysto oo go'aan laga gadho kiiska iyada oo dhinac maqanyahay, waa in gudigu ay marka hore daraasadeeyaan dokumentiga ee ku jira gal dacwadeedka kiiska khuseeyana bixinta amarka ogeysiiska kiiska iyo taariikhda dhegaysiga uu diyaariyay sido kalena diiwaangeliyey Xoghaynta gudigu, sida waafaqsam qodobada 27aad iyo 28aad ee Xeerka. Marka la daraasadaynayo dokumeentiyada haboon, waa in la go'aamiyo in ogeysiiska kiiska iyo ogaysiiska dhegaysigaba si haboon loo bixiyay oo waafaqsan Xeerka u degsan dhinaca maqan. Hadii, tusaale ahaan, dhinaca maqan uu yahay la dacweeyaha, gudigu waxay go'aan ku gaadhi karta in bixintii amarka aan si haboon loo bixin iyo in aanaey waafaqsanayn Xeerka, hadii ay ogaato in:

- ❖ Habka bixinta loo adeegsaday ayaa ka soo horjeeday habka ay tahay in loo bixiyo ee ku qoran Xeerka. Tusaale ahaan, ka hor inta aan la isku dayin helida la dacweeyaha si loo siiyo amarka ogaysiiska si shakhsiyah ah, fariinqaaduhu wuxuu amarka ogaysiiska geeyay guriga ama goobta ganacsi ee la dacweeyaha.
- ❖ Amarka ogeysiiska waxa la siiyay oo loo dhiibay qof aan qaan gaadhin ama aan xidhiidh la lahayn laguna kalsoonaan karin in uu ogaysiiska siin doono la dacweeyaha.
- ❖ Taariikhda uu la dacweeyuhu helay amarka ogeysiisku wuxuu aad ugu dhowyahay taariikhda lagu amray in uu yimaado Xafiiska Xoghaynta wakhti ku

filana muu helin si uu u yimaado sida la amray.

- ❖ La dacweeyuhu wuxuu la xidhiidhay Gudiga una sheegay in isagu/iyadu iman karin wakhtiga loo qabtay uuna soo jeediyay taariikhda uu/ay ku iman karo/karto, ama
- ❖ Qofka loo dhiibay dokumentiga si ay u siiso dhinac ayaa u sheegay Gudiga ama fariinqaadahii keenay amarka, in dhinaci uu maqanyahay oo aanu iman doonin ka hor taariikhda la dalbaday.

Hadii ay ku qanacdo in bixinta amarada loo samaayay si waafaqsan Xeerka, gudigu waa in ay eegto hadii ay jirto "sabab macquul ah" oo keentay maqnaanshaha dhinaca. Su'aasha u baahan in laga jawaabo ee kooxda Gudiga ay tahay in ay tixgeliyaan si taxadar leh waxa weeye: goorma ayay tahay in gudigu go'aamiso in ay jirto sabab macquul ah oo cudurdaar u noqonaya maqnaanshaha dhanaca? Duruufaha soo socda ayaa ah sababo dib loo isticmaali karo si looga cudurdaarto maqnaanshiyaha dhinaca:

- ❖ Dhinca maqani taariikhda ay heshay amarka ogeysiiska dhegaysiga wuxuu aad ugu dhawaa taariikhda loo qabtay dhegaysiga, mana haysto wakhti ku filan oo uu ku yimaado.
- ❖ Ogaysiin hore oo ka yimi dhinaca in isagu / iyadu aanay iman karin taariikhda lagu amray dalbaday sababtoo ah waxa jiray balan hore oo dhegaysi maxkamadeed ah, bukaan, dhimashada xubin qoyska ka mid ah, ku maqnaasho sababo ganacsi iyo wax la mid ah.
- ❖ Xaaladdaha kale ee noocaas ah ee ay gudigu u aragto in dhegaysiga kiiska iyadoo uu maqanyahay dhinacu uu yahay mid dhaawici karta xaqa dhegaysiga cadli

ee dhinaca iyo si haboon iyo natijayn khilaafka oo cadli ah.

Kooxda Gudigu waa in ay dib u dhigaaan dhegaysiga iyo amarka siinta ogaysiiska dhinaca maqan marka, ka dib marka la daraasadeeyo dokumentiyada kiiska iyo duruufaha ay ku qanacdo in maqnaanshaha dhinacu uu sabab u ahaa in lagu guuldareystay in si wax ku ool ah loo siiyo ogaysiiska maalinta dhegaysiga. Xaaladdaha kale oo dhan, gudigu waa in ay bilawdaa dhegaysiga go'aana ka gaadhaa kiiska iyadoo uu maqanyahay dhinacu.

4.1.4. Dib u dhigista kulanada dhegaysiga

Si looga fogaado in la sii dheereeyo habka xalinta kiiska, gudi kasta waxa laga filayaa in ay ka fogaato in ay dib u dhigto dhegaysiga khilaafyada, hadii aysan jirin sababo macquul ah ama sababo dib loogu dhigo dhegaysiga. Qodobka 31aad ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay wuxuu qoray xeer aad ugu muhiim ah si loo hubiyo oo lagu xaliyo khilaafyada lagu faylgareeyay GKHDH si wakhti haboon oo cadli ah, waxaanu soo jeedinayaa shuruudaha macquul ka dhigi karta in dib loo dhigo dhegaysiga kiisaska GKHDH. Sida ku cad qodobka Xeerka, kooxda gudigu dib uma dhigi karo dhegaysiga kiis uu bilaabay iyada oo aan la helin sabab macquul ah oo ay ka mid tahay:

- ❖ Waxa maqan dhinac muhiim oo ay tahay in ay joogaan kiiska.
- ❖ Awoodda qareenada, waraaqaha wakiillada dhinacyadu ma dhamaystirna, ilaa inta la dhamaystiraayo.
- ❖ Dhexdhexaadinta iyo wada xaajoodka u dhexeeya dhinacyada oo wali socda, ilaa go'aan laga soo saaro.

- ❖ Diidmo ayuu keenay mid ka mid ah labada dhinac, ilaa go'aan laga soo saaro, ama
- ❖ Sabab kasta oo kale oo lagama maarmaan u ah xalinta si haboon oo cadli ah iyo go'aaminta khilaafka.

Sababaha caqligalka ah ee kor ku xusan kuna saabsan dib u dhigista dhegaysiyada kiiska waa cad yahay oo si sahlana loo fahmi karaa, marka laga reebo waxa loola jeedo "Sabab kasta oo kale oo lagama maarmaan u ah xalinta si haboon oo cadli ah iyo go'aaminta khilaafka". Sidaa oo kale, sababaha loo qaadan karo sabab macquul ah oo dib loogu dhigi karo dhegaysiga khilaafka Gudiyada waxa ka mid ah: **maqnaanshaha markhaati muhiim ah, cadeyn documenti ah oo uu hayo dhinac sadexaad, baahida loo qabo in loo gudbiyo khilaafka ama arin gaar ah oo kiis ah Maxkamad karti u leh oo caadi ah si ay u go'aamiso, xaaladdaha kale ee ee lagama maarmaanka u ah dib u dhigista dhegaysiga si loo hubiyo in si haboon loo xaliyo kiiska, iyo ixtiraamida xaqa dhinacyadu u leeyihiin in ay helaan go'aan wakhti haboon oo cadli ah.**

Hal qodob oo muhiim ah in la xuso oo ku jira xeerkan ayaa ah in gudina aan loo ogolayn in ay dib u dhigto dhegaysiga kiisaska iyada oo ay sababato iska maqnaanshaha dhinac ama qareenkiisa/keeda. Maqnaanshaha dhinac ama garyaqaanta ama wakiilku waxuu noqon karaa sabab wanaagsan oo dib loogu dhigi karo kiiska hadii maqnaanshaha noocas ahi uu ku saleysan yahay sababo haboon ee hoos yimaada Qodobka 31aad ee Xeerka.

Xeerkani wuxuu Gudiga ka mamnuucayaa in ay dib u dhigto dhegaysiga kiiska iyada oo ay sabab u tahay sababo ay Gudiga lafteedu ay

sababtay ama xubnaha Gudiga ee dhegaysanaya kiiska. Sidaa darteed, gudigu waxay u baahantahay in ay ka fikirto sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo dib u dhigista dhegaysiga kiiskaskeeda sababo ay sababeeyeen xubnaheedu.

Talaabada 1aad: Eeg oo hubi in dhamaan dhinacyada iskhilaafsan oo dhami ay joogaan dhegaysiga, ama la matalayo, ama cida matalaysa ama Garyaqaanadooda, hadii uu jiro garyaqaan haysta wakiilnimo sharci ama awood wakiilnimo. Qodobka 33aad (2 iyo 3) ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay.

Qaybta II: Habraaca dhegaysiga hordhaca ah

4.2. Dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska

4.2.1. Ujeedooyinka dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska

Sida ku qeexan Qodobka 33aad (1) ee Xeerka, ujeedada ugu weyn ee dhegaysiga hordhaca ah ee kiisku waa in uu, "... diyaari kiiska si loo dhegaysato loona xaliyo sida ugu dhakhsaha badan ee ugu macquulsan". Ujeedada dhegaysiga hordhaca ahi waa in loo suurtageliyo GKHDH in ay fursad u helaan in ay kala soocaan qaybaha khilaafka ee sida degdega ah oo fudud loo xalin karo. Kood Gudi kasta waa in ay si haboon u hirgeliso habka hoos lagu sharaxay.

4.2.2. Habraaca lagu qabanayo dhegaysiga Hordhaca ah ee kiiska

Taariikhda loo qabtey qabashada hordhaca, waxa in xoghaynta gudigu ay qabanqaabiso hoolka dhegaysiga iyo in ay siiso faylka kiiska la dhegaysanayo Kooxda Gudiga ee loo xilsaaray kiiska. Ka hor inta aan la bilaabin dhegaysiga hordhaca ah ee dacwadda, kooxda Gudigu waa in ay qaadaan talaabooyinka soo socda:

Xubinta gudoominaysa kooxda Gudigu waa in yeedhisaa magacyada dhinacyada si loo hubiyo joogitaanka dhinacyada ama wakiilladooda, hadiiba ay jiraan.

Haddii labada dhinac midkood aanu iman oo aanu wakiil ama garyaqaan iman, kooxda Gudigu waxay eegi oo hubin doonaan in dhinaca maqan si haboon loo siiyay uuna helay ogeysiiska kiiska iyo/ama ogaysiiska taariikhda dhegaysiga hordhaca ah si waafaqsan Qodobka 32aad ee Xeerka iyo sida kor lagu naaqishay. Haddii lagu qanco in kiiska la dhegaysan karo ama go'aan laga gaadhi karo iyada oo uu maqanyahay dhinac, gudigu hore ayay u soconaysa go'aana way ka gaadhaysaa kiiska si waafaqsan. Hadiise ay ku qanacsan tahay in aany kiiska dhegaysan karin iyada oo uu maqanyahay dhinac, kooxda Gudigu waa in ay dib u dhigtaa dhegaysiga oo ay amartaa in loo diro ogaysiiska dhinaca maqan.

Haddii dhinac ama labada dhinacba ay maqanyihiin, laakiin wakiil u joogo dhinaca/dhinacyada maqan, gudigu waxay eegaysaa oo hubinaysaa ansaxnimada iyo dhamaystirka wakiilnimada, sidoo kalena amaraysa wakiilka ama garyaqaanka in uu soo bandhigo qoraal iyo warqad sax ah oo wakiilnimo ama awood garyaqaanimo. Haddii wakiilku aanu ahayn wakiil sharci ahaan, sida

waalid ka wakiil ah ilmo aan qaangaadhin ama hadii la ogaado in wakiilnimada ama awoodda garyaqaaneed uu yahay mid aan sax ahayn ama aan dhameystirneyn, kooxda Gudiga ayaa amraya dhinaca ay khuseeyso in ay dhamaystiraan oo ay saxaan wakiilka, dabadeedna dib u dhigaan dhegaysiga wakhti macquul ah.

Kadib marka aad hubiso joogitaanka dhinacyada iyo/ama ansaxnimada ama dhameystirka cida matalaysa iyo matalaada, hadii cid matalaysa uu joogo, kooxda Gudigu waxay sii wadi doontaa talaabada labaad ee habka dhegaysiga.

Talaabada 2aad: Akhrinta cabashada iyo jawaabta, iyo dhegaysiga dooda afka ah ee dhinacyada, diiwaangelinta liiska markhaatiyada iyo cadaymaha dokumentiga, hadii ay jiraan, ay dhinacyadu u hayaan kiiska; iyo hubinta in ay jiraan dhinac xiiseeynayan kiiska si loogu yeedho in ay ka soo qaybgalaan kiiska (Qodobka 33aad (4 ilaa 6) ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay.

Kadib marka aad eegtid joogitaanka dhinacyada iyo/ama ansaxnimada ama dhamaystirka wakiilka iyo wakiilnimada, hadiiba ay jiraan, xubinta madaxa u ah Kooxda Gudiga waxay akhrin cabashada iyo jawaabta, hadii jawaabta lagu gudbiyay qoraal ahaan ama hadii la dacweeyuhu aanu keenin jawaab qoraal ah, waxa cabashada loo akhrin doonaa dhinacyada, kadibna la dacweeyaha ayaa la weydiin doonaa in uu hadal ahaan isku difaaco. Kadib marka kiiska loo akhiriyo dhinacyada, gudigu waxay fursan u siin doontaa dhinacyada in wax ku daraan

ama wax ka bedelaan bayaanadooda kiiska. Marka sidaas la yeelo, xubinta madaxda u ah gudiga wuxuu marka hore weydiinayaa dacwoodaha in uu/ay jecelyihiin in ay wax kuaraan, cadeeyaan, ama uu wax ka sheego cabashada ka dibna la dacweeyaha ayaa la weydiin in uu/ay hayo wax jawaab oo ku saabsan cabashada. Hadii loo arko in ay lagama maarmaan tahay, gudigu waxay weydiin kartaa labadaba ama mid ka mid ah dhinacyada su'aal si ay u hesho faahfaahin dheeraad ah ama cadayn lagama maarmaan u ah in la fahmo khilaafka iyo in la ogaado nuxurka khilaafka u dhexeeya dhinacyada.

Kadib marka la akhriyo kiiska iyo doodaha hadalka ah ee dhinacyada, kooxda Gudigu wuxuu weydiin doona oo qori doona liiska magacyada dhinacyada, faahfaahin, iyo cinwaanada markhaatiyaasha, iyo faahfaahinta cadaynta dokumentiyada ay tahay in ay ku cadeeyaan kiiskooda. Hadii uu jiro cadayn dokumenti ah oo uu hayo urur kale, dhinaca uu khuseeyaa wuxuu u gudbin doonaa Gudiga magaca iyo cinwaanka ururkaas.

Kadib qorista liiska markhaatiyaasha iyo cadaymaha dokumentiga, hadii uu jiro dhinacyadu, Gudiga ayaa dib u dhigaysa dhegaysiga ugu badnaa muddo aan ka badnayn shan cisho waxay kaloo taariikh dhegaysi u qabanaysaa dhegaysi labaad oo hordhaca ah ee kiiska⁸. Inta aan la xidhin kulankan kowaad, madaxa gudigu wuxuu ku wargalinayaa dhinacyada hawlaha lagu qaban doono fadhiga labaad ee dhegaysiga oo ah: booqashada goobta dhulka la isku khilaafsanyahay iyo usoo gudbinta Gudiga

⁸ Eeg Qodobka 33 (6) ee Xeerka

wixii cadayn dokumenti ah ee ay hayaan, hadiiba ay jirto. Sida hore loo sheegay, Xeerku wuxuu u dejiyaa muddo muddada u dhexaysa fadhiga kowaad iyo fadhiga labaad ee dhegaysiga hordhaca ah, oo aan ka badneyn 5 cisho. Sidaas darteed kooxda Gudiga, gaar ahaan madaxa Gudigu, waa in ay hubiyaan in gudigu uu qabtey fadhiga labaad ee dhegaysiga hordhaca ah ugu badnaan shan cisho gudahood oo laga bilaabo maalintii ay gudigu qabatay fadhigii kowaad ee dhegaysiga.

Hadii, marka la dhegaysto bayaanada iyo doodaha afka ah ee dhinacyada, lagu qanco in uu jiro dhinac sadexaad oo danaynaya kiiska, gudigu waxay u baahanaan doontaa in ay dib u dhigto dhegaysiga oo ayna dalbato in loo yeedho dhinacaas danaynaya si ay ugu soo biirto kiiska⁹. Sidoo kale, Gudiga ayaa dib u dhigaysa kiiska si ay u go'aamiso codsi ay soo gudbiyeen mid ama labada dhinacba oo ku saabsan kusoo biirida kiiska dhinac saddexaad oo danaynaya kiiska. Hadii, inta lagu jiro fadhiga kowaad ee dhegaysiga hordhaca ah uu mid ka mid ah dhinacyadu uu diido, Gudiga ayaa diiwaangelinaysa diidmadaas waxay kaloo amaraysaa in diidmada la dhegaysan oo go'aan laga gaadhi doono kadib marka la booqdo goobta dhulka la isku khilaafsanyahay, kadib dhegaysiga fadhiga labaad ee hordhaca ah ee kiiska¹⁰.

⁹ Eeg Qodobka 38 (1 iyo 2) ee Xeerka.

¹⁰ Eeg Qodobka 35 ee Xeerka.

Talaabada 3aad: booqashada goobta dhulka la isku khilaafsanyahay, soo gudbinta cadaymaha dokumenti, iyo go'aaminta diidmada, hadiiba la jirto. (Qodobka 34aad ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay).

Maalinta fadhiga labaad ee dhegaysiga hordhaca ah, Gudiga oo ay la socdaan dhinacyada kiiska ayaa tagi doona oo booqan doona meesha uu ku yaalo dhulka la isku khilaafsanyahay¹¹. Inta lagu jiro booqashada dhulka la isku khilaafsanyahay, hadii loo baahdo gudigu waxay adeegsanaysaa khabiirada farsamo ee Dawladda Hoose si ay u qiyaasaan jihooyinka iyo cabirada dhulka la isku khilaafsanyahay ama ay soo saaraan warbixin farsamo oo guud kuna saabsan dhulka la isku khilaafsanyahay¹². Inta lagu jiro booqashada dhulka la isku khilaafsanyahay, Gudiga waxa looga baahanyahay, hadii ay joogaan dhinacyadu iyo hadii kaleba, in ay waydiiso dadka jaarka la ah dhulka la isku khilaafsanyahay wixii aqoona ee ay u leeyihiin dhulka la isku khilaafsanyahay iyo lahaanshaha dhulkaas, iyo wixii kale ee xaqiiqo ah ku saabsan dhulkaas gaarka ah¹³.

Maalinta xigta maalintii la booqday dhulka la isku khilaafsanyahay, gudigu waxay sii wadi doontaa in ay sii wado fadhiga labaad ee dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska si loo dhegaysto soo gudbinta cadayn dokumenti ah, hadii ay ka jiraan dhanka dhinacyada lagu amry in ay soo gudbiyaan sida ku cad farqada 6aad ee qodobka 33aad ee Xeerkan,

¹¹ Eeg Qodobka 34 (1) ee Xeerka.

¹² Eeg Qodobka 34 (2) (a) ee Xeerka.

¹³ Eeg Qodobka 34 (2) (b) ee Xeerka.

hadii ay macquul tahay. Hadiise aysan suurtagal ahayn sii wadida fadhiga, kooxda Gudigu waxay dib u dhigayaan dhegaysiga muddo aan ka badneyn sadex cisho waxayna u qabanayaan taariikh lagu soo gudbiyo cadaynta dokumentiga ee kor ku xusan¹⁴. Hase yeeshee, kooxda Gudigu waa in uu dib u dhigaa dhegaysiga fadhiga labaad ee hordhaca ah si uu u dhegaysto oo uu go'aan uga gaadho diidmada, hadiiba ay jirto, sida waafaqsan Qodobka 34 (6) iyo Qodobka 35 ee Xeerka iyo sida lagu sharaxay qaybta 4.5 xaga hoose.

Hadii aysan jirin wax diidmo ah, ama gudigu ay aragto diidmada tahay mid bilaa sal iyo raad toona lahay, kooxda Gudigu wuxuu sii wadi doonaa fadhiga labaad ee dhegaysiga hordhaca ah waxayna ku amri dhinacyada in ay soo gudbiyaan cadayn dokumentiga ay haystaan, sida lagu qoray fadhigii hore ee dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska. Marka la maareynayo soo gudbinta cadaynta dokumantiyada, kooxda Gudigu waa in uu hirgeliyaa Qodobka 34 (4 iyo 5) ee Xeerka. Xubinta gudoominaysa Kooxda Gudiga wuxuu marka hore weydiinayaa dacwoodaha in uu soo bandhigo cadaynta dokumentiyada isagu/iyadu ay u haystaan kiiska iyaga oo soo gudbinaya laba nuqul - asalka iyo nuqul koobi ah oo dukumintiyadooda oo dhan. Kadibna, la dacweeyaha ayaa lagu amrayaa in uu sidaas oo kale sameeyo.

Marka loo gudbinayo dokumentiyada Kooxda Gudiga, dhinac kasta waxa laga raba in uu sharaxaad kooban oo ku saabsan dokumentiga, maamulka, wakhtiga la bixiyay, nuxurka, iyo sidoo kale faahfaahinada kale ee muhiim ah khuseeyana dokumentiyada ay usoo gudbinayaan Kooxda Gudiga si ay ugu suurto galiso xubnaha Kooxda Gudiga iyo dhinacyada kale ee kiiska in ay fahmaan dabeecada, nuxurka, iyo haboonaanta dokumeentiga khilaafka.

Madaxa gudigu wuxuu tusayaa cadayn kasta oo cadayn dokumenti ah dhinaca kale, si dhinaca kale ay u hesho fursad ay ku diido ama ka doodo sharci nimada ama ansaxnaanta dokumentiga iyo/ama ku haboonaantiisa dhanka arimaha la isku khilaafsanyahay ee kiiska.

Kadib marka la qoro faahfaahinada dekontenti kasta ee ay soo gudbiyeen dhinac kasta, iyo caqabadaha ay dhinaca kale ka soo gudbiyeen dokumentiyadaas, madaxa gudigu wuxuu amarayaa in dokumentiga asalka ah loo celiyo dhinacii soo gudbiyaya sidoo kalena nuqulka dokumentigaa lagu fayl gareeyo galka kiiska. Waxay markaa ku dhawaaqaysaa joojinta fadhiga hordhaca ah, kadibna dib u dhigaysaa kiiska muddo aan ka badnayn shan cisho oo maalmo shaqo ah si loo sameeyo talaabada afaraad ee habka kiiska – si loo qaabeeyo arimaha khilaafka loona go'aamiyo in khilaafku yahay mid fudud, oo markaas go'aan laga gaadhi karo ama lagu xalin karo si dhakhso ah oo fudud.

¹⁴ Eeg Qodobka 34(3) ee Xeerka

4.3. Qaabaynta arinka ama arimaha khilaafka¹⁵

Talaabada afaraad ee habraacu wuxuu ku lug leedahay laba hawlood oo muhiim ah oo ay tahay in kooxda Gudiga ay sameeyaan. Hawsha ugu horeysa ee kooxda Gudigu waa in ay qaabeeyaan arinta/arimaha khilaafka.

Waa maxay arinka khilaafku? 'Arinku' waa arimaha khilaafka ay dhinacyadu khilaafku ku muransanyihiin ama ay ku kala aragti duwanyihiin.

Dhegaysiga khilaafka iyada oo aan la dejin arinta khilaafka si loo go'aamiyo natiijooyinka wuxuu sababaa dhegaysi iyo hab goaan qaadasho aan hagnayn waxtarna lahayn. Tani waxay ka soo horjeedaa dhinacyada is haysta xaqa ay u leeyihiin dhegaysiga wakhti go'an oo cadli ah. Sidaa darteed, kooxda Gudigu waa in ay marwalba qaabeeyaan arinka khilaafka, sida looga baahanyahay Xeerka.

Marka la qaabeenayo arinta khilaafka, kooxda Gudigu waa in ay tixraacaan oo ay daraasadeeyaan bayaanada sheegashada iyo jawaabaha, doodaha afka ah ee dhinacyada, iyo natiijooyinka booqashada goobta dhulalka la isku khilaafsanyahay. Waa in ay markaas go'aan ka gaadhaan waxyaabaha ay dhinacyadu isku diidanyihiin.

Xitaa meelaha ay dhinacyadu ku kala aragti duwanyihiin wax ku saabsan xaqiiq gaar ah, gudigu uma baahna in ay qaabeeyso arinka hadii aanu ahayn arin ay tahay in gudigu ay dhegaysato go'aana ka gaadho. Arimaha ay

tahay in ay go'aamiso gudigu waa kuwa saameynaya natiijada kiiska.

Tusaale ahaan, khilaaf lahaansho dhul oo ka dhexeeya Cali oo ah dacwoodaha iyo Cabdi oo ah la dacweeyaha. Cali wuxuu sheeganayaa in Cabdi uu qayb kamid ah dhulkiisa uu haysto. Cali wuxuu Kooxda Gudiga hortooda kaga dooday in isaga iyo Cabdi ay leeyihiin laba baloodh oo dhul ah oo isku xiga, iyo in Cabdi uu degay qayb ka mid ah dhulkiisa. Cabdi oo ka jawaabaya sheegashada wuxuu wargeliyay Gudiga in uu ogyahay in haysto qayb ka mid ah dhulka Cali iyo in aanu wax dhib ah u arkayn hadii Cali uu dhulkiisa dib u qaato. Xaaladdan, waxa cad in Cabdi uu qirtay in uu haysto qaybta maqan ee dhulka uu Cali sheeganayo. Maadaama ay labadooduba ay ku ku heshiiyeen, dhulka maqana aan la isku khilaafsanyahay cida leh, gudigu uma baahna in ay arinta qaabeeyso si ay u go'aamiso. Laakiin, waa in gudigu ay go'aan degdeg ah ay ka gaadho kiiska, maadaama uu Cabdi qiray ansaxsanaanta sheegashada Cali.

Dhibaataada kor ku xusan ee khilaafka lahaanshaha dhulka ee ka dhexeeya Cali iyo Cabdi, Cabdi wuxuu sheeganayaa in Cali uu ka iibiyey qaybta dhulka, iyo in aanu Cali sheegan karin lahaanshaha qaynta dhulkaas. Xaqiiqooyinka kiiskani wuxuu muujinayaa in Cali iyo Cabdi ay isku diidanyihiin lahaanshaha qayb ka mid ah dhulka la isku khilaafsanyahay. Sidaa darteed waxa jira arin ay tahay in gudigu ay qaabeeyso si ay u

¹⁵ Qodobka 36aad ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay

go'aamiso in ay xaliso khilaafka u dhexeeya Cali iyo Cabdi. Arinka ay tahay in la qaabeeyo waa, yaa iska leh qaybta dhulka la isku khilaafsanyahay: ma Cali mise Cabdi?

Kadib marka la qaabeeyo arinka/arimaha khilaafka, sida kor lagu sharaxay, kooxda Gudigu waxa ay qiimaynayaan oo ay go'aan ka gaadhayaan in uu khilaafku yahay:

- ❖ Khilaaf fudud oo ay gudigu ka gaadhi karto go'aan degdeg ah sida waafaqsan Qodobka 37 ee Xeerka; ama
- ❖ Khilaaf aan si fudud loo go'aamin karin ama loo xalin karin sida ku cad Qodobka 37aad ee Xeerka, laakiin loo baahanyahay in lagu xaliyo farsamo kale oo khilaaf sida waafaqsan Xeerka.

4.4. Qaadashada go'aano degdeg ah oo ku saabsan khilaafaadka sahlan iyo kuwa fudud (Qodobka 37aad ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay)

Kadib marka la qaabeeyo arinta/arimaha khilaafk ee ku xusan qodobka 36aad ee Xeerka, kooxda Gudiga hadii ay ku qanacaan in ay go'aan ka gaadhi karto khilaafka iyadoo ku saleysan natiijooyinkii dhegaysigii hordhaca ahaa, iyada oo aan loo sii gudbin dhegaysiga ama marxalada dhegaysiga, isla markiiba bixiya go'aan xalinaya khilaafka sida waafaqsan qodobada 37aad ee Xeerka. Xaaladdaha ay tahay in gudigu ay isla markiiba go'aan ka gaadho khilaafka waxa kamid ah kuwa ku liisgaraysan xagan hoose:

- ❖ Marka ay kooxda Gudigu ku qanacdo in la dacweeyuhu uu aqbalay, ama aanu ka

murmin ama iska difaacin eedaha isaga/iyada loo soo jeediyay.

- ❖ Marka ay kooxda Gudigu tixgeliyaan diidmo oo ay gaadhaan go'aan ku ku ogolaanayaan diidmada.
- ❖ Marka ay kooxda Gudigu qanacdo kadib booqashada goobta sida ku cad qodobka 33aad (1 iyo 2) ee Xeerka in dhulka mawduuca khilaafku uu ka duwanyahay dhulka la booqday.
- ❖ Marka ay kooxda Gudigu ku qanacdo in habka mid ka mid ah dhinacyadu uu ku helay lahaanshaha dhulka la isku khilaafsanyahay aanu waafaqsanayn Sharciga Dhulka ee Nambar 17 / 2001 ama hababka kale ee la aqbalay lana xidhiidha iibsiyada dhulka.
- ❖ Marka uu khilaafku la xidhiidho arimo farsamo laguna xalin karo iyada oo lala kaashado khubaro farsamo oo ka socda Dawladda Hoose iyo/ama dhul sahamiyayaal madaxbanaan ama injineerada dhismaha.
- ❖ Marka ay codsadaan dhinacyadu ama iskeed u aragto in ay muhiim tahay, waxa ay gudigu codsan kartaa oo ay ka heli kartaa Dawladda hoose macluumaad lagu kalsoonyahay oo ay isticmaali karto si ay go'aan uga gaadho una xaliso khilaafka.
- ❖ Marka mid ka mid ah dhinacyadu soo jeediyo in la dhaariyo dhinac dabadeedna dhinaca kalena uu dhaarto, iyo

Xaalad kasta oo kale oo kooxda Gudigu uu ku qanco in ay gaadhi karaan go'aan ku saleysan natiijooyinkii dhegaysigii hordhaca ahaa ee kiiska.

Qodobkan Xeerku wuxuu ka tarjumayaa ujeedooyinka GKHDH iyadoo ujeedada ugu wayn ay tahay in la sameeyo farsamo lagu xaliyo khilaafaadka dhulka magaaloooyinka si dhakhso ah. Sidaa darteed, koox Gudi kasta waxa looga baahanyahay in ay xaliyaan khilaafka isla kadib dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska xaaladaha qaarkood, oo ay ku jiraan, marka la dacweeyuhu aanu ka doodin ama difaacin sheegashada, halkay kooxda Gudiga ay aqbaleen diidmo, halkay dhulka la sheegayo uu ka duwanyahay dhulkii ay booqdeen kooxda Gudiga, iyo xaalad kaloo kasta oo kooxda Gudigu ay ku qancaan in ay gaadhi karto go'aan ku saleysan natiijooyinka dhegaysiga hordhaca ah.

Su'aalaha ay tahay in la tixgeliyo

- Waa maxay diidmo?
- Yaa soo gudbin kara diidmo?
- Goorma ayaa la soo jeedin karaa diidmada?
- Maxay yihiin sabab u noqon kara diidmada?
- Maxay tahay saameynta uu go'aanka Gudiga Gudiga ee aqbalida ama diidmada diidmadu?

Su'aalahan waxa lagaga hadlayaa Qodobka 35aad ee Xeerka.

4.5. Go'aamida diidmada

Qodobka 35aad ee Xeerka GKHDH ee wax laga bedelay wuxuu sharaxayaa liiska waxyaabaha sabab u noqon kara diidmada, waxaana ka mid ah:

Qeexida diidmada sida ku cad qodobka 35aad:

Diidmadu waa qoraal qoran oo ku doodaya in kooxda Gudigu aanay lahay awood maamul ay ku dhegaysato oo ay go'aan ka gaadho khilaafka taas oo dalbanaysa in kooxda Gudigu ay xidhaan kiiska. Diidmada waxa soo jeedin kara dhinac kamid ah kuwa iskhilaafsan waxaana la soo jeedin karaa oo keliya inta lagu gudo jiro marxalada dhegaysiga hordhaca ah ee kiiska.

- a. Kooxda Gudigu ma laha awood maamul ay ku dhegaystaan oo go'aan ka gaadhaan khilaafka: sababtoo ah dhulka la isku khilaafsanyahay ma aha dhul magaalo, ama khilaafku wuxuu ku lug leeyahay arin aanay gudigu u lahayn awood maamul ay ku dhegaysato, sida dhaxalka.
- b. Maxkamad ayaa horay u go'aamisay oo soo saartay go'aan kama dambeys ah oo ku saabsan khilaafka.
- c. Khilaafku wali wuxuu ka socdaa hab kale oo dib-u-heshiisiin ah waxaanu ku jiraa gacanta dhexdhexaadayaal ay magacaabeen kuna heshiiyeen dhinacyada oo dhan.
- d. Mid ka mid ah dhinacyadu ma aha dhinac danaynaya khilaafka.

Su'aalaha ay tahay in la tixgeliyo

- Waa maxay "soo dhexgalka dhinac sadexaad"?
- Goorma ayuu qofi soo dhexgeli karaa ama la soo dhexgeli karaa kiis?
- Yaa soo dhexgeli kara ama la soo dhexgeliin karaa kiis?

Kooxda Gudigu wuxuu go'aamin karaa diidmooyinka ka dib marka uu dhegaysto dhinacyada is haysta sidoo kalena ku amraya dhinacyada in ay soo gudbiyaan cadaymaha laga yaabo in ay lagama maarmaan u yihiin Kooxda Gudiga si ay go'aan u gaadhaan.

- ❖ Hadii marka la dhegaysto dhinacyada, ay kooxda Gudigu aqbalaan diidmada, waxay soo saari doontaa amar qoran oo sababaysan oo aqbalaya diidmada, sidoo kalena amraya xidhitaanka kiiska, iyo in faylka kiiska laga saaro diiwaanka kiiska.
- ❖ Hadii kooxda Gudiga aanu aqbalin diidmada, waxay soo saari doonaan amar qoraal ah, iyo amar sababaysan oo diidaya diidmada sidoo kalena amraya in kiisku sii socdo.

Dhinaca uu xukunku ku dhacay waxay xaq u leedahay in ay racfaan u qaadato Maxkamadda Sare (15) shan iyo toban cisho gudahood oo laga bilaabo taariikhda amarka. Marka Maxkamadda Sare racfaan loo qaato la xidhiidha amarka Kooxda Gudiga ee diiday diidmada, Kooxda Gudiga waxa looga baahanyahay in uu joojiyo dhegaysiga kiiska ilaa ay hesho xukunka Maxkamadda Sare oo diidaaya rafcaanka.

Qeexida dhexgelida: Dhexgelida waxa loola jeedaa xaaladdaha qof aan khilaafka hor yaala Gudiga aan dhinac ka ahayn laakiin loo ogolaado inuu ka soo qayb galo ama lagu soo dari karo kiiska si uu uga qayb qaato dhegaysiga kiiska.

4.6 Soo dhexgalka dhinac sadexaad

Sida ku cad Qodobka 38aad (1) ee Xeerka, soo dhexgalka dhinac sadexaad ee dhegaysiga kiiska waxa loo ogolaan karaa marxad kasta oo ka horaysa inta aan la gabagabayn dhegaysiga khilaafka.

Bilawga dhexgalka dhinac sadexaad ee kiiska hor yaala Gudiga wuxuu ku iman karaa mid kamid uun sadexda xaaladood ee soo socda sida ku xusan Qodobka 38aad (2 iyo 3) ee Xeerka:

- Hadii qof aan ka mid ahayn dhinacyada isku hilaafsan, laakiin daneynaya kiiska, uu ka codsado Gudiga in ay u ogolaayo in uu ku biiro kiiska.
- Hadii mid ka mid ah labada dhinac ee iskhilaafsani uu GKHDH ka codsado in ay u yeedho cid sadexaad/qof kale si uu ugu biiro kiiska, ama
- Marka la bilaabo hawsha Gudiga lafteeda, waa hadii ay gudigu ku qanacdo in uu jiro cid danaynaysa kiiska oo ay tahay in loo yeedho si uu ugu soo biiro kiiska.

Xaaladda 1aad: *Soo dhexgalka dhinac sadexaad ay soo jeediso kooxda Gudigu*

Hadii kooxda Gudigu ay dhegaysigooda ku qancaan in uu jiro qof daneynaya kiiska laakiin maqan, waa in kooxda Gudigu ay ku soo daraan kiiska. Tusaale ahaan, hadii kooxda Gudigu ay ogaato inta lagu jiro dhegaysiga hordhaca ah in dhulka la isku khilaafsanyahay ay wada leeyihiin in ka badan hal qof laakiin aanay mulkiilayaashu kuligood wada joogin ama aan la matalin, waa in ay amar ku bixisaa in dhamaan dadka daynaynaya ay ku biiraan kiiska. Waxay dib u dhigeysaa dhegaysiga kiiska, iyadoo la sugayo fulinta amarka – in dhamaan dadka danaynaya kiisku ay ku biiraan kiiska. (Eeg Qodobka 38aad (2) ee Xeerka).

Xaaladda 2aad: *Dhinacyada kiiska ayaa raba in dhinac sadexaad kusoo biiro kiiska*

Hadii dhinac kamid ah kiisku uu rabo in dhinac sadexaad ay ku soo biirto, waa in ay Gudiga u soo gudbiyaan codsi qoraal ah oo si cad u muujinaya jiritaanta danta ugu jirta kiiska oo lagama maarmaan ka dhigaysa ku soo biiritaankooda kiiska. (Eeg Qodobka 38aad (4) ee Xeerka).

Xaaladda 3aad: *Qofka saddexaad wuxuu doonayaa inuu ku biiro kiiska*

Hadii cid aan ahayn dhinacyada kiisku ay rabto in ay kusoo biirto khilaafka yaala Gudiga, waxa isaga/iyada looga baahanyahay in ay usoo gudbiyaan codsi qoraal ah Gudiga iyagoo si cad u muujinaya jiritaanka daynta uu/ay kiiska ku leeyahay/leedahay. (eeg Qodobka 38aad (3) ee Xeerka).

Ujeedada ugu weyn ee Xeerka ee lagu dejinayo habraacyada lagu maareeyo soo dhexgalka dhinaca sadexaad waa in lagu hubiyo in gudiyadu aanay aqbalin codsi dhinac sadexaad si ay ugu biiraan ama lagu soo daro kiiska kaas oo loogu talagalay in la marin habaabiyo, la qaso, ama la sii dheereeyo dhegaysiga iyo xalinta khilaafka. Sidoo kale, gudigu markay go'aaminayso in ay aqbasho ama aanay aqbalin codsiga dhinac sadexaad oo kusoo biira ama lagu soo biiryo, waa in ay hubisaa in codsiga la soo gudbiyey uu si cad u muujinayo danta ugu jirta kiiska ee loo baahanyahay in la ilaaliyo ama la difaaco. Si loo qabto hawshan, waa in gudigu xaqiijiyo:

- ❖ Marka codsiga uu soo gudbiyo dhinac sadexaad, waa in kooxda Gudigu ay ka dalbadaan codsadhaha in uu keeno cadayn sidoo kalena ku qanciyaa in ay aqoonsadaan danihiisa/heeda ugu jirta kiiska iyo faa'iidooyinka isaga/iyada ay ogaan karaan hadii ay ku soo biiraan kiiska ama khasaaraha laga yaabo in uu ku dhaco hadii go'aanka khilaafka la

gaadho isaga/iyada oo aan ku jirin laguna dhegaysan intii ay socotay dacwaddu.

- ❖ Marka mid ka mid ah dhinacyada iskhilaafsani uu codsado in cid sadexaad lagu soo daro kiiska, gudigu waa in ay ka dalbataa codsadaha in uu muujiyo kuna qanciyo mid uun:
 - Jiritaanka faa'iido ay tahay in la helo ama in loo ilaaliyo ama dhinac sadexaad oo lagama maarmaan ka dhigaysa in dhinaca sadexaad lagu soo daro kiiska, ama
 - Jiritaanka faa'iido la'aan ama khasaare isaga ama dhinaca sadexaad laga yaabo in ay ogaadaan ama uu ku dhaco, hadii kiiska lagu xaliyo iyada oo aan dhinaca sadexaad aanu ku soo biirin lana dhegaysan intii uu socday dacwadda kiisku.

Hadii lagu qanaco codsiga dhinaca sadexaad si ay ugu soo biiraan ama lagu soo daro kiiska, kooxda Gudigu waa in ay soo saaraan amar qoraal ah oo sababaysan oo aqbalaya codsiga, dib u dhiga dhegaysiga, iyo amrida dhinaca sadexaad in loo yeedho si ay ugu soo biirto kana qaybqaadato dhegaysiga iyo dacwadda kiiska. Hadii kooxda Gudigu aanu ku qanacsanayn codsiga soo dhexgalka dhinaca sadexaad, waa inuu soo saaraa amar qoran oo sababaysan oo diidaya codsiga.

Xaalad 1aad: GKHDH ee Hargeysa waxay dhegaysanaysay khilaaf dhuleed u dhexeeya Cali iyo Xasan oo ku saabsan lahaanshaha dhulka xajmigiisu yahay 100m

x 180 m oo ku yaala Degmada Koodbuur. Laakiinse, (20) labaatan qoys oo ah Dadka Gudaha ku Barakacay ama (DGkB) ayaa ku noolaa afartii sano ee la soo dhaafey dhulkaa la isku khilaafay. Qoysaska DGkB waxay iska soo doorteen sadex xubnood si ay u matalaan sidoo kalena qaataan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah kiiska ee khusayso dhulka ay ku noolyihiin. Sadexda xubnood ee matalaya qoysaska DGkB waxay soo gudbiyeen codsi qoraal ah oo ay kaga codsadeen GKHDH in ay u ogolaato in ay ku biiraan khilaafka. Sida ku xusan codsiga ay u gudbiyeen GKHDH, sadexda wakiil waxay codsigooda ku soo biiraantaanka kiiska ku salaynayaan xaqiiqooyinka soo socda: waxay tilmaameen in qoysaska DGkB ee ay matalayaan ay ku noolaayeen dhulka la isku khilaafsanyahay muddo afar sano ah waxayna weli ku noolyihiin dhulkaas. Waxay kaloo sheegeen in qoysaska DGkB ee ay wakiilka ka yihiin ay degeen dhulka la isku khilaafsanyahay ka dib markii ay ka soo barakaceen guryahooda taas oo waafaqsan amarka fulinta ee Maamulka Dawladda Hoose ee u ogolaanayay sidoo kalena amray in qoysaska barokacay la dejiyo dhulkaas. Intaa waxa dheer, waxay kaloo ku doodeen in go'aan kasta oo gudigu ka gaadho khilaafka ay u badantahay in uu saameeyo qoysaska DGkB ee ku nool dhulka la isku khilaafsanyahay, sidaa daraadeed, waxay lagama maarmaan u tahay in ay ku biiraan ayna ka qayb qaataan kiiska maadaama ay dan ka leeyihiin khilaafka.

- Gudigu in uu aqbasho miyaa codsiga ay soo gudbiyeen wakiillada qoysaska DGkB?
- Latalin fiican miyay u tahay Gudiga in ay iskeed ugu yeedho Maamulka Dawladda Hoose si ay ugu soo biiraan

kiiska?

Hadii aanay GKHDH iskeed ugu yeedhin Maamulka Dawladda Hoose si ay ugu soo biiraan kiiska, ma kari karaa mid ka mid ah dhinacyada kiisku in uu GKHDH ka codsado in ay u yeedho Maamulka Dawladda Hoose si ay ugu soo biiraan kiiska?

Xaalad 2aad: Xasan wuxuu kusoo faylgareeyay kiis GKHDH ee Hargeysa oo ku lug leh dhul ku yaala Koodbuur oo uu ka iibsaday Cali oo lahaan jiray. Sida lagu muujiyay cosdiga kiiska ee lasoo gudbiyay, Xasan wuxuu ku dooday in nin la yidhaahdo Faarax uu ku noolyahay dhulkiisa isaga oo aan ogayn wax ogalaansho ahna siin. Xasan wuxuu kaloo sheegay in Faarax uu yahay Cali walaalkii, oo ah ninkii isaga (Xasan) ka iibiyey dhulka). Dhegaysiga hordhaca ahaa ee kiiskan, Faarax (la dacweeyaha) wuxuu ku dooday in uu isagu leeyahay dhulka la isku khilaafsan yahay, wuxuuna sheegay in dhulkan (dhulka khilaafku ka taaganyahay) uu yahay dhul uu ka dhaxlay aabihii sidaasna uu ku helay lahaanshaheeda. Faarax wuxuu kaloo tilmaamay in dhulka la isku khilaafsan yahay uu ka mid yahay dhul ay isaga iyo walaalkii Cali ay ka dhaxleen aabahood.

Xasan wuxuu ka codsaday Gudiga in ay u yeedho Cali si uu ugu soo biiro kiiska. Wuxuu cosdigiisa ku sababeeyay in uu Cali ka iibiyey dhulkan. Sidaa darteed, Cali waa in uu faahfaahiyo oo cadeeyo lahaanshiyahiisa dhulkan, ama, in uu dib u soo celiyo lacagtii uu ku iibsaday dhulka oo uu magdhowna siiyo iyo wixii khasaaro ah ee gaadhay.

- Codsiga Xasan ma la aqbali karaa?
- GKHDH in ay iskeed ugu yeedho kana dalabto Cali in uu ku soo biiro kiiska

miyaa?

Qaybta III: Xalinta Khilaafka iyada oo loo marayo wada-xaajood iyo dhexdhexaadin

4.3 Wada-xaajoodka iyo Dhexdhexaadinta u dhexaysa Dhinacyada.

Hadii dhegaysiga hordhaca ah kadib ay Gudigu ay ku qanacdo in aanay haysan iyo/ama aanay heli karin cadayn ku filan si loo gaadho go'aan deg deg ah oo kama dambeys ah, Gudigu waxay sii wadi doontaa in ay khilaafka ka garsoorto oo ay go'aamiso (Qodobka 37aad ee Xeerka)

Laakiin, intaa ka hor, Gudigu waa in ay dhinacyada waydiiso in ay rabaan in ay khilaafkooda ku xaliyaan wada xaajood ama dhexdhexaadin. (Qodobka 41aad ee Xeerka). Gudigu waa in ay fulisaa habka wada xaajoodka iyo dhexdhexaadinta ee hoos lagu sharxay.

4.3.1. Habraaca wada-xaajoodka

Hadii ay dhinacyadu doortaan in ay khilaafkooda ku xaliyaan wada xaajood, Gudigu waa in ay dabaqdaa Qodobka 42aad ee Xeerka oo koobaya habraaca wada xaajoodka. Sidaa darteed, Kooxda gudigu waxay dib u dhigaysaa dhegaysiga waxayna dhinacyada siinaysa muddo ay ku wada xaajoodaan kuna xaliyaan khilaafka. Hadii ay dhinacyadu gaadhaan heshiis mudadaas

gudaheed, waxa looga baahanyahay in ay Gudiga u soo gudbiyaan nuqulka heshiiska oo qoraal ah lana cadeeyay oo koobaya qodobada ay ku heshiiyeen. Sida uu qoray Xeerku, nuqulka heshiiska ay gaadheen dhinacyadu waa in lagu muujiyaa oo si cadna u sheegaa macluumaadka soo socda:

- a. Magaca Gudiga uu heshiisku ku socdo.
- b. Lambarka tixraaca kiiska ee Gudiga ee la xidhiidha khilaafka.
- c. Magacyada dhinacyada heshiiska gaadhay.
- d. Qodobada lagu heshiiyay.
- e. Xaqiijinta in labada dhinacba ay ku qanacsanyihiin qodobada lagu heshiiyay.
- f. Saxiixyada dhinacyada iyo taariikhda heshiiska, iyo
- g. Magacyada iyo saxeexyada laba markaati oo goobjoog ahaa markii ay dhinacyadu saxiixayeen heshiiska.

Ka dib marka la hubiyo in heshiiska ay soo gudbiyeen dhinacyada ay ku jiraan dhamaan macluumaadka loo baahanyahay iyo sidoo kalena ay dhinacyadu xaqiijiyaan in ay gaadheen oo ay saxiixeen heshiiskaas, Gudigu waa in ay go'aamisaa oo xalisaa kiiska iyada oo ku salaynaysa qodobada heshiiskii ay gaadheen dhinacyada iskhilaafsanaa.

Hadii lagu qanco in nuqulka heshiiska aanay ku jirin macluumaadka loo baahanyahay oo dhan, ama dhinacyadu aanay gaadhin wax heshiis ah sidoo kalena xalin khilaafkooda mudadii la siiyay, Gudiga ayaa ka garsooraysa kiiska waxayna dhinacyada u sheegaysaa si ay u diyaar garoobaan oo ay yimaadaan dhegaysiga kiiska taariikhda la qabtay.

4.3.2. Dhexdhexaadin



Hadii dhinacyada iskhilaafsani ay doortaan dhexdhexaadin, Gudigu waa in ay ku dhaqantaa Qodobka 43aad ee Xeerka. Kooxda gudigu wuxuu dib u dhigayaa dhegaysiga wuxuuna ku amrayaa dhinacyada in mid waliba uu soo magacaabo tiro isku mid ah odayaal ah, iyo in ay muddo cayiman ku soo gudbiyaan liiska odayaasha ay magacaabeen dhinacyadu si ay u xaliyaan kiiska. Marka la helo liiska odayaasha, sida waafaqsan Qodobka 43 (2) ee Xeerka, waxay Gudigu soo saari qoraal amar ah oo:

- a. Ansixinaya magacaabista dhexdhexaadayaasha sida ay magacaabeen dhinacyadu.
- b. Qeexaya arin / arimo gaar ah ee khilaafka ee ay tahay in dhexdhexaadayaashu ay dhegaystaan oo ay xaliyaan, iyo
- c. Qoraya wakhti cayiman oo aan ka badnaan Karin 20 cisho oo ay tahay in

dhexdhexaadayaashu ay tahay in ay go'aamiyaan oo ay xaliyaan khilaafka sidoo kalena ay Gudiga u soo gudbiyaan go'aanka dhexdhexaadintooda.

Marka la soo saaro amarka, Gudiga ayaa qaban doonta fadhi ay tahay in dhexdhexaadayaasha la magacaabay iyo dhinacyadu ka soo qayb galaan waxaanay u akhrinaysaa una sharaxaysaa dhexdhexaadayaasha iyo dhinacyadaba waxyaabaha ku qoran amarka ay soo saartay iyo waajibaadyada dhexdhexaadayaasha iyo dhinacyada iskhilaafsan ee ku saabsan waxqabadka hawlaha iyo waajibaadka dhexdhexaadinta sida ku xusan Qodobka 44aad ee Xeerka. Gudigu waa in ay ku wargelisaa xubnaha dhexdhexaadinta in looga baahanyahay in ay fuliyaan oo ay u hirgeliyaan dhexdhexaadinta si waafaqsan iyo u hogaansamida waajibaadkooda dhexdhexaadnimo sida ku xusan qodobada Xeerka. Tani waa mid aasaasiya oo muhiim ah. Sida ku xusan Qodobka 44 (3) ee Xeerka, inta lagu guda jiro habka dhexdhexaadinta, waxa masuuliyad iyo waajibaad ku ah dhexdhexaadayaasha oo dhan in ay:

1. Dhegaystaan dhinacyada iskhilaafsan iyo markhaatiyaadooda si siman oo cadaalad ah.
2. Diirada saaraan oo go'aamiyaan arinta /arimaha la isku khilaafsanyahay oo keliya ee ay Kooxda gudigu ku amartay in ay tixgeliyaan oo xaliyaan.
3. Si cadaalad iyo dhexdhexaadnimo leh u go'aamiso, iyo
4. Ku xaliso khilaafka mudada ay u qabatay Kooxda gudigu.

Waajibaadkani waxay sameeynayaan ubucda ansaxnimada go'aanka dhexdhexaadinta ay gaadheen odayaashu. Sidaa darteed, hadii ay u muuqato ama la ogaado in odayaashu aanay u hogaansamin mid ama dhamaan waajibaadyada kor ku xusan, waa in aanay Gudigu aqbalin oo ansixin go'aankooda.

Hadii ay dhexdhexaadayaashu ay mudadii loo qabtay ku xaliyaan kiiska, waxay Gudiga usoo gudbin doonaan go'aanka dhexdhexaadinta oo qoraal ah, isla markaana waa in ay keenaan nuqul ka mid ah go'aanka ay siiyaan mid kasta oo ka mid ah dhinacyada iskhilaafsan. Go'aanka dhexdhexaadinta ee odayaasha looga baahanyahay in ay u gudbiyaan GKHDH waa in uu ahaado qoraal sidoo kalena ay ku qoranyihiin macluumaadka hoose sida waafaqsan Qodobka 44 (5) ee Xeerka:

1. Magaca Gudiga uu heshiiska ku socdo.
2. Lambarka tixraaca kiiska Gudiga.
3. Magacyada dhinacyada iskhilaafsan.
4. Magacyada Dhexdhexaadayaasha.
5. Arinta /arimaha khilaafka ee la dhexdhexaadinayo.
6. Talaabooyinka iyo hawlaha lagu fuliyay habka dhexdhexaadinta.
7. Qodobada go'aanka dhexdhexaadinta.
8. Saxiixa odayaasha / dhexdhexaadayaasha iyo taariikhda go'aanka dhexdhexaadinta.

Marka ay hesho nuqulka qoraalka ah ee go'aanka dhexdhexaadinta ay soo gudbiyeen odayaasha dhexdhexaadnimo, waxay Kooxda gudigu eegaysaa bal in go'aanka ay ku jiraan dhamaan macluumaadka looga

baahanyahay. Hadii go'aanka dhexdhexaadinta aanay ku jirin dhamaan macluumaadka looga baahanyahay, Gudiga ayaa nuqulka go'aanka dhexdhexaadinta ku celin doonta dhexdhexaadayaasha waxayna amraysaa in ay dhamaystiraan oo saxaan. Kadib marka ay hubiso in go'aanka dhexdhexaadinta loo qoray si waafaqsan shuruudaha la qoray, Gudigu waxa ay dhamaan dhinacyada u qabanaysaa fadhi dhegaysi si ay u ansixiyaan go'aanka dhexdhexaadinta ay soo gudbiyeen odayaashu. Xiliga dhegaysigana Kooxda gudigu waxay weydiinayaan dhinacyada in ay jiraan wax diidmo ah ama muran ka dhan ah ansixinta go'aanka odayaasha. Hadii aanay jirin wax diidmo ama dood ah oo ka soo horjeeda go'aanka odayaasha sidoo kalena ay ku qanacdo ansaxnimada go'aanka dhexdhexaadinta, waa in ay Kooxda gudigu soo saaraan go'aan ansixinaya oo xalinaya kiiska iyadoo lagu salaynayo go'aanka dhexdhexaadayaasha.

1. Gudigu waa in ay diidaa go'aanka dhexdhexaadinta oo ay kiiska ka garsoortaa hadii: ay odayaashu aanay wax go'aan ah ka gaadhin khilaafka mudadii loo qabtay.
2. Hal dhinac aanu ku qanacsanayn ansaxnimada go'aanka odayaasha sidoo kalena marka ay Gudigu dhegaysato jawaabta dhinaca kale ay ku qanacdo in go'aanka dhexdhexaadintu aanu hogaansamin mid uun ama dhamaan sharciyada dhexdhexaadinta ee sharcigan u qoran, gaar ahaan shuruudaha lagu sheegay Qodobka 44 (3) ee Xeerka.

3. Gudigu waxa ay ogaatay in go'aanka dhexdhexaadintu aanu u hogaansamin Xeerka.

Qaybta IV: Garsoorida iyo Go'aansiga kiiska

4.4 Habraaca lagu garsoorayo khilaafka

Hadii aan khilaafka lagu xalin karin wada xaajood ama dhexdhexaadin, Gudiga ayaa ka garsoori doonta khilaafka oo dhegaysan dhinacyada iskhilaafsan iyo markhaatiyaasha. Waxay kaloo eegaysaa wixii cadeymo dokumenti ah si waafaqsan habraaca ku xusan qodobada 45 ilaa 48 ee Xeerka.

Gudiga waxa saaran waajibaadyadan soo socda si loo xaqiijiyo hab dhegaysi salaxan oo iyo go'aan cadli ah:

- Hubi xasiloonaada iyo habaynta qolka/hoolka kiiska lagu dhegaysanayo, si loogu suurto geliyo dhinacyada iyo ka qaybgalayaasha kale in ay maqlaan oo ay si fudud u fahmaan doodaha iyo maragfurada.
- Iska hubi in markhaatiyadu ay dibada ka joogaan qolka / hoolka ilaa iyo inta loo baahanayo oo loo yeedhayo.
- Si haboon u hogaami dhegaysiga kiiska oo hubi in dhinacyadu ay ku koobnaadaan xaaladdaha iyo fikradaha iska soo horjeeda ee ay GKHDH ku sheegeen khilaafka kiiska sidoo kalena gudbi cadayn si toos ah ama si aan toos ahayn ugu lug leh ama la xidhiidha xaaladda ama fikradaha iska soo horjeeda ee kiiska.

- Ka jooji dhinacyada iyo markhaatiyaasha in ay sameeyaan doodo ama keenaan cadaymo iyo maragfuryo aan khusayn ama la xadhiidhin khilaafka, arinta, ama qodobada la isku khilaafsanyahay ee kiiska.

4.4.1 Dhegaysiga Markhaatiyada iyo gudbinta Cadaymaha Dokumentiga ah

Marxaladan garsoorida ee khilaafka waxay Gudigu ka dalbaneysaa dhinacyada in ay soo gudbiyaan wixii cadayn ah ee dokumenti ah ee aan ahayn kuwii la soo gudbiyey laguna dhegastay dhegaysigii hordhaca ahaa iyo in ay u yeedhaan markhaatiyo ay rabaan in ay Gudigu dhagaysato¹⁶.

Maalinta loo qabto dhegaysiga ee la furo dhegaysiga, waxay Kooxda gudigu ku amrayaan dacwoodaha in uu soo gudbiyo wixii khuseeya ee cadaymo dokumenti ah. Gudigu waxay qaban doontaa dhegaysiga iyo soo gudbinta cadaynta dokumentiga ah si waafaqsan Qodobka 33 (4, 5, iyo 6) ee Xeerka. Sidaa darteed marka dacwooduhu uu gudbinayo dokumentiyada waa in uu si kooban ugu sharaxo Gudiga waxa ku qoran, taariikhda, iyo hay'ada soo saartay ama urur dokumenti kasta oo uu/ay soo gudbinayo dabadeedna uu Kooxda Gudiga siinayo asalka iyo nuqulka dokumentiga. Gudigu waxay la dacweeyaha u sii gudbin doontaa nuqulka asalka ah ee dokumenti kasta ee uu soo gudbiyay dacwooduhu waxaanay weydiinaysaa la dacweeyaha in uu ka qabo wax walaac ah ama diidmo la xidhiidha ansaxnimada ama waxa ku qoran dokumentiga / yada. Gudigu wuxuu kaloo

dacwoodaha weydiin karaa wixii su'aalo ah ee ay u aragto in ay lagama maarmaan yihiin si loo fahmo nuxurka iyo faahfaahinta dokumentiga.

Haddii ha'yad/qof kale uu hayo cadayn dokumenti oo khuseeya kiiska dacwoodaha, waxay Kooxda gudigu u diraysaa codsi afka ah ama qoraal ah ha'yada/qofka si ay dokumentigaa ugu soo gudbiyaan Gudiga. Marka la helo dokumentiga la codsaday waxuu Gudigu fadhi dhegaysi uu dhinacyada iskhilaafsan ugu akhriyayaa waxa ku qoran. Sidoo kale, Kooxda Gudiga waxay la wadaagi doontaa dokumentiga dacwoodaha iyo la dacweeyahaba si ay u maqlaan oo ay tixgeliyaan wixii walaac ah ee ay ka qabaan ansaxnimada ama waxa ku qoran.

Ka dib marka la soo gudbiyo dokumentiyada, hadiiba ay jiraan, gudigu wuxuu dhegaysanayaa markhaatiyada sida waafaqsan Qodobka 46 (2 iyo 6) ee Xeerka. Marka ugu horeysa gudigu waxay dhegaysanayaan markhaatiyada uu dacwooduhu rabo in gudigu dhegaysto, hadiiba ay jiraan. Gudiga wuxuu weydiinayaa markhaatiga dhaarsan, ka dib marka uu waydiiyo qorana magaca, da'da, cinwaanka iyo shaqada, in uu si faahfaahsan uga sheekeeyo waxa uu/ay ka ogtahay khilaafka. Ka hor inta aanu markhaatigu bixin maragfurka, Gudigu wuxuu weydiinayaa la dacweeyaha in uu/ay wax diidmo ah ka qabo/qabto dhegaysiga markhaatiga. Haddii uu la dacweeyuhu uu keeno sababo lagu reebi karo markhaatiga ay khuseeyso, waxa Gudiga looga baahanyahay in ay si degdeg ah u tixgeliyaan oo go'aan uga gaadhaan arinta. Marka uu markhaatigu bixiyo uuna dhameeyo maragfurkiisa, la dacweeyaha waxa la weydiinayaa in uu/ay qabo/qabto

¹⁶ Eeg Qodobka 46 (1 iyo 3) ee Xeerka

wax walaac ah oo ku saabsan waxa markhaatigu uu margfuray ama hadii uu/ay doonayo/doonayso in uu/ay weydiyo/weydiiso markhaatiga su'aalo. Kooxda gudigu ayaa sidoo kale waydiin kara su'aal kasta oo ay u aragto lagama maarmaan si loo cadeeyo maragga iyo / ama saxsanaanta markhaatiga.


Marka ay dhamaadaan dhegaysiga iyo cadaynta dokumenti iyo markhaatiyada dacwoodaha, waxa Gudigu amrayaa la dacweeyaha in uu soo gudbiyo cadayn dokumenti, hadiiba ay jirto, iyo in uu u yeedho markhaatiyada uu rabo/ay rabto in la dhagaysto. Marka la fulinayo gudbinta cadaynta dokumentiga iyo dhegaysiga markhaatiyada la dacweeyaha, waa in Kooxda gudigu uu ku dhaqantaa habraacii dacwoodaha oo kale markii loo dhegaysanaayay cadaymaha iyo markhaatiyada. Dacwoodaha waxa la siin doonaa fursad la mid ah si uu uga jawaabo/jawaabto una soo gudbiyo/gudbiso dood ka soo horjeeda cadaynta dokumenti iyo maragga markhaatiga uu keenay la dacweeyuhu.

Inta lagu guda jiro dhegaysiga hadiiba ay soo baxdo dhibaataada farsamo, Gudiguna u arko in khabiir farsamo lagama maarmaan yahay si kiiska loogu xaliyo hab saxda ah oo cadli ah, Kooxda gudigu waxa u diri karaan ama u xilsaari karaan khabiir/khabiiro farsamo oo daraasadayn doona arinta isla markaana dib ugu warcelin doonaa Gudiga si waafaqsan Qodobka 48aad ee Xeerka. Kan waxa lagu sharxi doonaa qaybta 4.4.2 ee hoos ku qoran.

Marka ay dhamaato soo gudbinta dokumentiyada iyo dhegaysiga dhinacyada iyo markhaatiyada, Gudigu ayaa dib u

dhigaysa dhegaysiga sidoo kalena la sugayo go'aanka. Marka dib loo dhigayo dhegaysiga waxa Gudiga looga baahanyahay in uu qabto oo uu ku wargaliyo dhinacyada taariikhda fadhiga ay Gudigu u sheegi doonto dhinacyada go'aankeeda. Sidoo kale, Gudigu wuxuu sidoo kale u sheegi doonaa dhinacyada in, hadii ay u aragto lagama maarmaan in Gudigu ay si madaxbanaan u raadin doonto si ay u hesho cadaymo dheeraad ah si loo sameeyo xukun sax ah oo cadli ah.

4.4.2 Cadaynta khabiirka



Hadii loo arko lagama maarmaan in la helo cadayn ka timid khabiir farsamo si loo gaadho go'aan cadaalad ah oo kama dambeys ah, Kooxda gudigu wuxuu magacaabi karaa oo uu u xilsaari karaa khabiiro farsamo kuwaas oo daraasadaynaya oo qori doona warbixino farsamo loo isticmaali karo cadayn ahaan khilaafka. Kooxda gudigu waxay kaloo yeeli karaan sida ku xusan qodobka 48 (1) ee Xeerka in ay magacaabaan una xilsaaraan khabiir/khabiiro farsamo mid ka mid ah labada siyaabood ee soo socda:

- Gudigu waxa ay iskeed qoraal ahaan ka codsan kartaa khabiir ama koox khabiir ah oo ka socda waaxda maamulka Dawladda hoose, ama
- Gudigu iyadoo kula heshiinaysa dhinacyada ay arinta u magacaabi kartaa khabiir madaxbanaan ama khabiir.

Marka la xilsaarayo khabiir farsamo waa in Kooxda gudigu ay soo saaraan amar qoraal ah oo ku socota farsamayaqaanka / farsamayaqaanada iyadoo la siinayo faahfaahinta iyo goobta dhulka la isku khilaafsanyahay iyo arinta khabiirada looga baahanyahay in ay daraasadeeyaan oo ay dib ugu soo warbixiyaan mudada loo cayimay¹⁷. Nuqul ka mid ah amarka qoraalka ah ayaa la siin doonaa khabiirka/khabiirada ay magacaabtay una xilsaartay Gudigu. Kadib marka shaqada la dhameeyo waxa looga baahayahay khabiir/khabiirada farsamo in diyaariyo oo uu Gudiga usoo gudbiyo warbixin farsamo oo qoraal. Warbixintu waa in ay sharaxaad ka bixisaa hawlaha la qabtay si loo hirgeliyo fulinta daraasada loo xilsaaray iyo waxyaabaha ka soo baxay daraasada¹⁸. Gudigu waxay dhinacyaa kiiska siin doontaa nuqul ka mid ah warbixinta farsamada dabadeedna waxay qabanaysaa fadhi dhegaysi uu khabiirku ku soo bandhigi doono warbixinta farsamada¹⁹. Kadib marka ay dhaariso khabiirka/khabiirada farsamada waxay kulankan ay Gudigu ka codsanaysaa khabiirka/khabiirada in ay si faahfaahsan u

soo bandhigaan warbixinta farsamo ee ay soo gudbiyeen. Kadib marka la soo bandhigo warbixinta, gudigu wuxuu siin doonaa dhinac kasta fursad uu ku waydiiyo khabiirka/kabiirada wax kasta oo ku saabsan warbixinta farsamada. Kooxda gudigu waxay sidoo kale weydiin karaan khabiirada su'aal kasta oo ay u arkaan in lagama maarmaan tahay si loo xaqiijiyo saxsanaanta iyo runta warbixinta ay soo gudbiyeen.

4.4.3 Qiimaynta cadaynta

Marka ay Kooxda gudigu soo gebogebeeyso dhegaysiga kiiska, waxa muhiim u ah in si taxadar leh u daraasadayso dhamaan cadaymaha - cadaynta dokumentiga iyo maragga markhaatiga – ay heshay ee khuseeya khilaafka. Kooxda gudigu wuxuu u baahanyahay in ay daraasadayso dhamaan cadeymaha ay heshay si ay u aqoonsato cadayn khuseeysa ee ay tahay in ay tixgeliso, qiimayso cadaynta la heli karo ee kiiska iyo in ay go'aamiso cadaymaha ugu muhiimsan ee khuseeya ee ay tahay in ay tixgeliso si ay khilaafka ugu bixiso go'aan cadli ah.

Qodobka 47aad ee Xeerka GKHDH wuxuu bixiyaa qodobo ay tahay in ay Gudigu raacdo marka ay daraasadaynayso oo ay qiimeenayso cadaynta. Sida waafaqsan Qodobka 47(1), "Cadeyn kasta oo loo soo bandhigo Kooxda Gudiga waa in loo tixgeliyaa munaasib ah marka ay ku filan tahay in in ay cadayso ama beeniso arin shay kasta ee khilaaf".

¹⁷ Eeg Qodobka 48 (2) ee Xeerka.

¹⁸ Eeg Qodobka 48 (4) ee Xeerka.

¹⁹ Eeg Qodobka 48 (5) ee Xeerka.

1) Dokumentiyada ay si sharci ah u bixisay Dawladda Hoose.

Sida ku xusan Qodobka 47 (2) ee Xeerka GKHDH: "Dokumentiyada say si sharci ah u bixisay Maamulada Dawladda Hoose waa in loo tixgeliyo cadayn khuseeysa iyo cadayn adag oo cadaynaysa lahaanshaha..."

Marka arinta la isku khilaafsanyahay ee hor yaala Gudigu uu yahay lahaanshiyaha dhulka, cadayta ugu khuseeynta badan uguna adag ee la keeni karo lagu cadayn karo sheegashada lahaanshaha dhulku waa dokumenti sharci ah oo ay bixisay Maamulka Dawlada Hoose. Dokumentiga ay bixiso Dawladda Hoose lama aqbali karo loomana tixgelin karo cadayn adag si loo cadeeyo sheegashada lahaanshaha dhulka hadii la diido lana cadeeyo in:

- a. Ay jirtay mulkiyad si sharci ah lagu helay xiligii dokumentigaa la bixiyay, ama
- b. Ay jirtay helitaanka dhulka si sharci xiligii dokumentiga la bixiyay.
- c. Dokumentiga la bixiyay intii uu khilaafku socday, ama
- d. Dokumentiga lagu bixiyay iyadoo lagu salaynayo mulkiyada been abuur ah, ama dokumentiga lagu bixiyay hab sharci daro ah.

2) Dokumenti Mulkiyad dhuleed ay bixisay Dawladdii hore ee Soomaaliya.

Sida ku xusan Qodobka 47 (6) Xeerka GKHDH: 'Dokumentiga mulkiyad dhuleed sharci ah oo ay bixisay Dawladdii hore waa in loo tixgeliyaa cadayn khuseeysa hadii aan la xaqiijin in aanay hoboonaayn'. Sababaha kor ku xusan ee reebi karo ogolaanshaha dokumentiyada maamulada Dawladda Hoose

waa in lagu dabaqaa diidmada iyo sharciyada dokumentiga lahaanshaha dhulka ee ay bixisay Dawladdii hore ee Soomaaliya.

3) Haysashada Mudada Dheer

Sida ku qoran Qodobka 47 (3) ee Xeerka GKHDH: 'Haysashada Muddada dheer, dhisme degsiimo sida dhismaha, seeska, beerista, dayrka iwm. waxay noqon karaan cadayn haboon loona tixgelin karo lahaansha dhulka, waa hadii aan la cadayn in aan lagu helin xoog, qasab, si aan daacad ahayn ama hab kasta oo kale oo sharci daro ah'.

Marka aanay jirin wax dokumenti lahaanshaha dhulka oo sharci ah, oo la aqbali karo sida ku cad Qodobka 47aad (2 iyo 6) ee Xeerka GKHDH, haysashada muddada dheer iyo ku helista si sharci ah waxa loo tixgeliyaa cadaynta ugu haboon ee lahaanshaha dhulka. Haysashada noocaas oo kale ah waa in loogu tixgeliyaa in ay u tahay cadayn adag lahaanshaha dhulka magaalooyinka iyadoo la cadeeyo in lagu helay si sharci daro ah mooyee.

4) Maragga Markhaatiga

Qodobka 47 (4) ee Xeerku wuxuu ku tacaluqaa maragga markhaatiga: 'Maragga uu bixiyo markhaati la rumaysan karo oo waafaqsan diinta Islaamka iyo Mabaadi'da shareecada waxa loo tixgelin doonaa cadayn khuseeysa marka ay si toos ah ula xidhiidho dhulka la isku khilaafsanyahay sidoo kalena ay ku filantahay in ay cadeeyso arin khuseeya khilaafka. "Sida ku xusan qodobkan, waxaa Gudiga laga filayaa in aanay tixgelin maragga

markhaatiga marka ay hayso ama heshay sharci dokumenti cadaynaya sheegashada lahaanshaha khilaafku ka taaganyahay. Waxa keliya ee ay Gudigu tixgelinaysaa maragfurka markhaatiga marka aan la hayn dokumenti sharci ah oo lagu kalsoonaan karo.

Dhaarinta dhaarta iyo Qirashooyinka dhinacyada

Qodobka 47 (5) waxuu bixinayaa talooyin marka ay tahay in Gudigu tixgeliso qirashooyinka iyo dhaar qoraal ah oo cadayn ah si cadeeyo ama loo beeniyo khilaafka, oo sheegaysaa sidan soo socota " Qirashada iyo dhaarta qoraalka ah ee dhinac waa in loo tixgeliyaa cadayn khuseeysa marka ay ku filanyihiin in si buuxda u cadeeyso xalinta khilaafka, ama marka ay ku filantahay in ay cadeeyso arin khuseeya khilaafka". Sida ku qeexan qodobkan, qirasho iyo / ama dhaarinta dhaarta dhinac ee khilaafku waxa loo tixgelin karaa cadayn khuseeysa marka aanu jirin dokumenti sharci ah iyo / ama markhaati la rumaysan karo si loo go'aamiyo khilaafka, waa hadii ay qirashadaas ama dhaartaasi ay ku filantahay in ay si buuxda u xaliso khilaafka.

Tan waxa aan lagu dhaqayn marka qirashadu tahay qirasho in aan cadaynta dokumentigu ansax ahayn ama aanu khuseeynin.

Tixgeli tusaalahan soo socda: Isbarbardhig kiis iyo Qiimaynta cadaymaha

Caasha oo ah ganacsade wayn ayaa GKHDH ee Hargaysa ku soo faylgaraysay kiis la xidhiidha lahaanshaha dhul ku yaala Hargeysa oo ay dacweenayso nin la yidhaahdo Axmed. Caasha waxay kiiskeeda ku sheegatay in iyada oo aan ogayn ogolaanshana laga qaadan uu Axmed iska

degay dhul baloodh ah oo ay ka iibsatay nin la yidhaahdo Jaamac sanadkii 2010. Waxay kaloo sheegtay in ay codsatay kana heshay dokumenti lahaansho sharci ah Maamulka Dawladda Hoose sanadkii 2014. Dhulka khilaafku ka taaganyahay wuxuu ku yaalaa bariga magaalada Hargaysa, waana aag si dhakhso ah kobcay oo dhowaan uun uu gaadhay qorshaha magaaladu. Axmed wuxuu ku dooday in dhulka uu ku noolyahay ee ay Caasho sheeganayso uu isagu leeyahay. Axmed wuxuu GKHDH horteeda ka sheegay in dhulka uu aabihii lahaa isna ka dhaxlay. Waxa uu sheegay in aabihii xoolaha ku raaci jiray dhulka xiliyada roobkana uu beeran jiray. Axmed ayaa sidoo kale ku dooday in dadka agagaarka ku nooli iyo deriska dhulka la isku khilaafnanyahay ay isaga garanayaan sidoo kalena ogyihiin in dhulka uu aabihii lahaa. Wuxuu sheegay in aabihii uu dhintay 1990 oo uu halkaas ku noolaa laga soo bilaabo 1993 ilaa 2001 ka hor inta aanu tegin wadamada Carabta. Wuxuu intaa ku daray in uu wadankiisa ku soo noqday badhtamaha sanadkii 2012 waxaanu qorsheynayay in uu dhismayaal ka dhiso dhulka.

Markii ay GKHDH ay booqatay goobta dhulka la isku khilaafsanayay, waxay waraysatay sadex nin oo waayeel ah oo la, deris ah dhulka uu khilaafku ka taaganyahay, waxaanay GKHDH u sheegeen in dhulka uu lahaa nin la yidhaahdo Faarax Cali oo ah Axmed aabihii meeshana ku noolaa ilaa iyo 1970. GKHDH waxay arkeen raadadkii beerashada ee Faarax wax ku beeri jiray. Dhanka kale, Caasha waxay u yeedhay Jaamac oo soo gelisay kiiska. Jaamac wuxuu ku dooday in dhulka uu ka iibiyay Caasha in uu isagu lahaa, iyo in uu haysto dokumenti sharci ah oo ay bixisay Dawladdii hore 1989.

Xaqiiqooyinka kiiska ayaa muujinaya in

saddexda dhinac ee ku lugta leh kiiska ay haystaan sadex nooc oo cadayn ah, arintu waxa ay tahay, tee baa ah cadaynta ugu muhiimsan ee ay tahay in la tixgeliyo, oo cadayn ahaan ah si loo sheegto lahaanshaha dhulka khilaafku ka taaganyahay.

❖ Dhulka ma Caasha ayaa leh maadama ay haysato dokumenti lahaansho ay bixisay Dawladda Hoose ee Hargaysa, oo dhulkana ay ka iibsatay Jaamac oo Dawladdi hore ee Soomaaliya ka haystay dokumenti lahaansho sharci ah?

Cadaynta haysashada mudada dheeri miyey ka awood badantahay cadaynta dokumenti ee ay Caasho haysato si ay u cadayso shegashada lahaanshaha dhulka khilaafku ka taaganyahay?

Qaybta V: Gaadhista iyo qorista Go'aamada Gudiga

Go'aamada Gudiga

Qaybtan waxaynu ka jawaabi doonaa labada su'aalood ee soo socda:

- 1) Sidee ayay Gudigu u samayn kartaa go'aan sababaysan oo ku saabsan khilaafka dhulka? Iyo
- 2) Sidee ayay tahay in ay Gudigu u qorto go'aamadeeda ku saabsan khilaafka?

4.4.4 Habka Go'aan qaadashada

5 Inkastoo aan lagu sheegin Xeerka GKHDH, waxa jira hab u sahli kara Gudiga Gudiyada gaadhidda go'aano sababaysan oo ku saabsan khilaafyada. Habkani wuxuu uga baahanyahay Kooxda Gudiga

in ay daraaseeyaan dibna u eegaan diiwaanka dhegaysiga iyo dacwadda khilaafka iyagoo qaadaya talaabooyinka soo socda:

Talaabada ugu horeysa ee ay tahay in Gudigu qaado waa in ay la muujiso arinta/arimaha khilaafka. Su'aalaha ay tahay in Gudigu ay weydiiso:

- ❖ Waa maxay arintu ama arimaha la isku khilaafsanyahay ee ay ahayd in Gudigu go'aamiso oo go'aan ka gaadho?
- ❖ Miyay ahayd sheegasho lahaansho?
- ❖ Miyay khusaysaa haysasho?
- ❖ Miyay khusaysaa xuduud, khariidayn, ama arin dhul qorshayn?
- ❖ Miyay khusaysaa iibista ama wareejinta mulkiyadda?

Muujinta arinta saxda ah ee khilaafku wuxuu u suurtagelinayaa Gudiga in ay si sahlan u aqoonsato oo ay go'aamiso cadaynta ay u baahantahay si loo go'aamiyo khilaafka loogana fogaado in wakhtiga lagu khasaariyo tixgelinta cadaymo ama arimo aan khusayn arimaha la isku khilaafsanyahay ee kiiska hor yaala. Kadib marka ay muujiso arinta/arimaha khilaafka, Gudigu waxa ay u baahantahay in ay go'aamiso dhinaca uu saaranyahay culayska cadayntu, tusaale, ayay tahay in ay cadayso ama beeniso arinka la isku khilaafsanyahay ama la sheegtay ee kiiska.

Talaabada 2aad: Daraasee cadaymaha oo dhan oo ay ku jiraan maragfurada markhaatiga la keenay lana helay ee la xidhiidha kiiska.

Marka la daraasaynayo cadaynta, Gudigu waxay u baahantahay in ay aqoonsato oo ay

kala soocdo cadaynta la aqbali karo ee khusaysa iyo sidoo kale cadaynta kale ee ay iskeed u heshay hadiiba ay jiraan. Gudigu waxay go'aan ka gaadhi doontaa haboonaanta cadaymaha iyada oo xaqiijinaysa cadayn kasta oo ay heshay ama la helay oo la xidhiidha arinka ama arimaha la isku khilaafsanyihiin dhinacyada iskhilaafsani. Gudigu waxay sidoo kale u baahantahay in ay tixgeliso aqbalaadda mid waloo cadayn ah oo la soo gudbiyey ama la helay ee khilaafka.

Talaabada 3aad: ku hirgelinta cadaynta arinta / arimaha la isku khilaafsanyahay

Kadib marka la aqoonsado cadaymaha khuseeya iyo kuwa la aqbali karo, talaabada sadexaad ee ay tahay in Gudigu ay ku hirgeliso codaymahaa arimaha la isku khilaafsanyahay ee kiiska. Hawsha Gudigu waa in ay go'amisaa in cadaymaha ay ogaatay uu ku filanyahay in lagu cadeeyo ama beeniyo arinka la isku khilaafsanyahay ee kiiska. Sidaa darteed Gudiga ayaa go'aan ka gaadhi in dhinaca uu saaranyahay culayska cadayntu uu keeno cadaymo ku filan si uu si buuxda u cadeeyo ama u beeniyo arinka la isku khilaafsanyahay.

Talaabada 4aad: Gaadhida Go'aanka

Hawsha ugu way ee Gudiga ee hoos timaada talaabada afaraad waa in ay go'aamiso oo ay gaadho go'aan ku saabsan khilaafka taas oo ku saleysan natiijada ay xaqiiqsadeen markii ay ku hirgeliyeen cadaymaha la hayo arinka/arimaha khilaafka. Tusaale ahaan, hadii lagu qanco in dhinaca uu saaranyahay culayska cadayntu aany soo gudbin cadayn ku filan si ay si buuxda ugu cadeeyaan ama

beeniyaan arinta / arimaha la isku khilaafsanyahay, Gudigu iyaddo ku salaynaysa gabagabada, waa in ay gaadho go'aan xalinaya khilaafka.

Talaabada 5aad: Sababaha

Si loo hubiyo in ay go'aamadeedu sharci yihiin, Kooxda gudigu waa in uu sababeeyaa go'aanadeeda. Talaabada shanaad, waxa Kooxda Gudiga looga baahanyahay in ay bixiso sababaha go'aanka ay ku gaadhay ee hoos yimaada talaabada afaraad ee xage sare. Si loo hirgaliyo hawshan, Gudigu waxay u baahanaan doontaa in ay koobto arimaha la isku khilaafsanyahay ee kiisaska ay qaabeeyay lagana filayay in ay go'aamiso, kadibna si cad u sheegaan cadaynta ay heshay ee ay ku salaysay go'aankeeda khilaafka ama arin kasta oo khilaafka ah, marka khilaafku uu khuseeyeyo in ka badan hal arin.

Talaabada 6aad: Doodda iyo codeynta

Kadib marka la qabto dhamaan hawlaha loo baahanyahay, waxa muhiim ah in Kooxda gudigu ay u xilsaaraan mid ka mid ah xubnhooda si uu u diyaariyo una qoro go'aankooda oo qabyo qoraal u gudbiyaan kooxda Gudiga si ay uga doodaan oo u codeeyaan. Go'aan qabyada ahi waa in uu ka tarjuma dhamaan hawlaha la qabtay ee hoos yimaada talaabooyinka kor ku xusan una hogaansantaa nidaamka qorista go'aanka ee lagu qoray Xeerka GKHDH. Dhamaan xubnaha Kooxda gudigu waa in ay fadhiistaan si ay uga doodaan go'aanada qabyada ah ee la diyaariyay. Markaa laga doodayo go'aanka, xubin kasta iyo dhamaan xubnaha Kooxda Gudiga waxa ku waajib ah in ay u dhaqmaan si waafaqsan mabaadi'da aasaasiga ah ee dhexdhexaadnimada iyo

cadaaladda si loo hubiyo oo loo bixiyo go'aan cadaalad ah. Kadib doodda, xubnaha Kooxda gudigu waa in ay codeeyaan oo ay go'aanna gaadhaan iyadoo la raacayo aqlabiyadda codeynta xubnaha Kooxda Gudiga.

4.4.5 Qorista Go'aamada Gudiga

Xeerka GKHDH wuxuu wax ka qabtaa habka qorista go'aannada Kooxda Gudiga. Sida ku xusan Qodobka 49aad (5) ee Xeerka GKHDH:

"Go'aamada Kooxda gudigu waa in ay noqdaan kuwo qoraal ah oo ayna ku jiraan macluumaadka soo socda:

- a) Cinwaanka oo ah Jamhuuriyadda Somaliland.
- b) Magaca iyo Loogada Gudiga.
- c) Lambarka tixraaca kiiska ee khilaafka.
- d) Taariikhda go'aanka.
- e) Dhinacyada khilaafka iyo wakiilladooda sharci, hadiiba ay jirto.
- f) Soo koobidda xaqiiqooyinka kiiska oo ay ku jirto calaamad muujinaysa arinta / arimaha khilaafka.
- g) Sababaha Go'aanka, oo ay ku jiraan macluumaadka ama cadaynta la tixgeliyey la iskuna haleeyay.
- h) Go'aannada xubinta Gudiga.
- i) Ogeysiinta labada dhinac in ay xaq u leeyihiin rafcaanka iyo sharciyan wakhtiga kama dambeysta ah ee qoran ee la qaadan karo rafcaanka.
- j) Magaca xubnaha Kooxda Gudiga iyo saxiixyadooda, iyo
- k) Shaambadda Gudiga".

Sidaa darteed, go'aan kasta oo ay gaadho Gudigu waa in ay uu ahaado mid qoraal ah,

oo ay ku jirto xogta saxda ah ee muujinaysa shuruudaha kor ku xusan oo koobaya sharciyan shuruudaha qoran.

Ka dib marka la diyaariyo oo la qoro go'aankeeda khilaafka ay dhegaysatay, waxa kooxda Gudiga looga baahanyahay in ay dhinacyada iskhilaafsan fadhi dhegaysi dadwayne ugu akhriyaan go'aanka isla markaana ay dhinacyada siiyaan nuqul ka mid ah go'aanka marka la codsado²⁰.

²⁰ Eeg Qodobka 49 (4) ee Xeerka GKHDH.

